= RET TIL LIGESTILLING

buug-yaraha koorsada

SOMALI

TUSMADA QAYBAHA BUUGGA

Aqristaha sharafta badanow 4
Sinaanta iyo Denmark 5
Xuquuqaha iyo waajibaadyada aasaasiga ah 6
Caddaalad bulsho iyo is aaminaad 6
Taariikhda sinaanta ee Denmark 7
Taariikhihii ugu muhiimsanaa halgankii sinaanta ragga iyo dumarka ee Denmark 9
Sinaanta iyo goobaha guud 11
Lebiska 11
Suuqa shaqada iyo sinaanta ragga iyo dumarka 12
Xuquuqda iyo waajibaadka goobta shaqada 12
Suuqa shaqada iyo sinaanta ragga iyo dumarka 13
Haweenka iyo ragga iyo goobta shaqada 14
Dhaqaalaha gaarka ah 14
Fasaxa waalidka caruurta leh (forældreorlov) 15
waxbarashada 16
Hab dhismeedka qoyska 17
Noocyada qoyska, guurka iyo wada noolaanshaha 17
Guurka iyo ansaxiisa 17
Guur khasab ama jajuub ah 19
Mas'uuliyadda waalidka 21
Guurka iyo dhaqaalaha 21
Kala tegid iyo furiin 21
Dhaqaalaha marka la isfuro 23
Mas'uuliyadda caruurta marka la is furo 23
Ilmaha, tarbiyadda ilmaha iyo waalidnimada 24
Sinaanta wiilasha iyo gabdhaha 24
Heshiiskii caruurta ee UN-ka 24
Xuquuqda caruurta 25
Talo-ka-qayb-gelinta iyo talo-u-madaxbanaanida caruurta iyo dhalinyarada 26
Nolosha gaarka ah ee qofka 27
Caddaadis bulsho 27
Dhaqan celinta ilmaha 27
Mas'uuliyadda dowladda 28
Xarun maalmeedyada caruurta 29
Waxbarashada khasabka ah ee caruurta iyo mas'uuliyadda waalidka 29
Dhalinyarada Denmark 29
Jirka iyo galmada 31
Dadka u galmooda dadka la nooca ah (Khaniisnimada) 31
Xuubka bikradnimada 32
Gudniinka 32
Soo tuuridda ilmaha (soo-xaaqid) 33
Tacadiga iy kufsiga 33
Kufsiga iyo akhlaaq xumidda 33
Tacadiga 34

AQRISTAHA SHARAFTA BADANOW

Denmark ragga iyo dumarku waxay ka simanyihiin xuquuqda, waajibaadka iyo fursadahaba. Sidaas darteed Denmark ragga iyo dumarku way simanyihiin. Sinaanta xuquuqda ee ragga iyo dumarku waxay muhiimad gaar ah u leedahay bulshada daanishka. Tusaale ahaan ragga iyo dumarkuba way shaqaystaan, caruurta yar-yar ee aan gaarin waqtigii iskuulka waxaa maalintii lagu xanaaneeyaa goobaha lagu xanaaneeyo ubadka sida (vuggestuer iyo børnehaver). Sidoo kale sinaanta ragga iyo dumarku waxay muhiimad u leedahay nolosha qoyska. Lamaanaha is qabaa waxay qaybsadaan shaqada guriga iyo mas'uuliyadda qoyska sida xanaanaynta iyo tarbiyadaynta caruurta. Waxay sidoo kale leeyihiin xuquuq isku mid ah marka laga hadlaayo guurka iyo furitaankaba. Wiilasha iyo gabdhaha waa in loo la dhaqmaa si siman og isku mid ah, waxayna xaq u leeyihiin in ay doortaan waxbarashada ay rabaan, waxyaalaha ay doonayaan in ay sameeyaan xilliga firaaqada, saaxiibada iyo lamaanaha ay doonayaan.

Intaas iyo ka badanba waxaad ka aqrin kartaa buuggan. Buuggan yari wuxuu ku saabsan yahay sinaanta ragga iyo dumarka ee ka jirta Denmark iyo xuquuqaha iyo waajibaadyada la xiriira sinaanka nolosha qoyska, suuqa shaqada iyo nolosha caadiga ah. Buuggan waxaad ka baran doontaa sharuucda daanishka ee la xiriirta sinaanta ragga iyo dumarka. Waxaad sidoo kale ku baran doontaa waxyaalaha kale ee bulshadu sida gaarka ah u qiimayso iyo waxyaalaha bulshado ka filayso qof walba oo degan Denmark.

Buuggan waxaa loo isticmaali karaa marjac ahaan wuxuuna qayb ka yahay kooraska " xuquuqda sinaanta" ee loogu talo galay in lagu dhigo iskoolada luqadaha (sprogskoler), naadiyada lagu kulmo (klubber) iyo ururada ku howlan is-dhex-galka ee ay leeyihiin dadyowga aan Daanishka ahayn ee degan Denmark. Koorsadan waxaa la diyaariyey 2018 waxaana iska kaashaday diyaarinteenta ALS Research, Xarunta qaxootiga (Center for Udsatte Flygtninge) iyo haya'dda Integrationsnet ee hoos tagta hay'adda Dansk Flygtningehjælp waxaana ka dalbatay waaxda Sinaanta ee ka tirsan wasaaradda sinaanta (Ligestillingsafdelingen). Waxaa sidoo kale mahad gaar ah iska leh iskuulka luqadda Lærdansk ee magaalooyinka Århus iyo Odense. Waxaa sidoo gacan weyn ka geystay diyaarinta buuggan dowladaha hoose ee magaalooyinka Odense iyo Koobenheegan.

AQRIS WACAN!

SINAANTA IYO DENMARK

WAAJIBAADYADA
Sinaanta waxaa loola jeedaa in ragga iyo dumarku ay siman yihiin ayna tahay in si isku mid ah loola dhaqmo. Waxay kaloo ka dhigantahay in ragga iyo dumarku ka siman yihiin dhanka xuquuqda, waajibaadka iyo fursadahaba. Denmark waxaa ka jira sharci la xiriira sinaanta ragga iyo dumarka. Sharcigaasi wuxuu ragga iyo dumarkaba siinayaa fursado isku mid ah, saamayn iyo is-dhex-gal bulsho oo siman.

Waxaa tusaale ahaan mamnuuc ah in ragga iyo dumarka goobaha ganacsiga iyo suuqyada loogula dhaqmo si aan isku mid ahayn iyadoo sabab looga dhigayo in ay yihiin rag ama dumar. Waxaa sidoo kale reebban in dadka si kala duwan loogula tacaamulo iyadoo loo eegayo midabka jidhkooda, isirkooda, cidda ay u galmoodaan, diintooda iyo aragtidooda siyaasadeed. Sidoo kale waa mamnuuc in qof laga codsado ama lagu amro inuu dadka kala sooco.

Dhammaan ragga iyo dumarkuba waxay xor u yihiin fikirkooda iyo in ay aaminaan wixii ay doonaan. Sidoo kale ragga iyo dumarkuba waxay xaq u leeyihiin in u noolaadaan sida ay doonayaan iyaga oo ilaalinaya sharciga dalka.

Meel-marinta sharciyada sinaanta ragga iyo dumarka:

Qodobka 1aad, faqradda § 1: *"Sharcigan ujeedadiisu waxay tahay in la hor-u-mariyo sinaanta ragga iyo dumarka ee la xiriira dhammaan howlaha bulshada waxaana ka mid ah in loo sinaado is-dhex-galka, saamaynta iyo fursadahaba iyadoo laga duulayo in ragga iyo dumarku isku mid yihiin. Sidoo kale sharcigani wuxuu ka hor-tegayaa kala soocidda tooska ah iyo midda dadban ee ku salaysan nooca qofka (rag iyo dumar). Sharcigani wuxuu sidoo kale ka hor-tegaa anshax xumidda ficilka ah iyo tan afka ahba."*

Qodobka 2aad § 2: *"Qofna qof kale si toos ah iyo si dadban toona uma sooci karo arin la xiriirta nooca qofka (rag ama dumar) awgeed. In qof lagu amro inuu sameeyo kala sooc la xiriira nooca qofka waxay ka dhigantahay kala soocid."*

Waxaa jirta kala soocid toos ah iyo mid dadban. Kala soocidda tooska waxay tusaale ahaan noqon kartaa in qofka loo diido shaqo uu codsaday iyadoo sabab looga dhigayo nooca qofka (lab iyo dhedig) ama halka uu isir ahaan ka soo jeedo. Kala soocid dadban ama aan toos ahayn waa marka qofka lagu xiro shuruudo adag oo aanu qofka soo buuxin Karin sababtoo ah nooca uu yahay (lab ama dhegid) ayaan u saamaxayn. Tusaale ahaan Denmark waxaa ka jirtay in qofka noqonaya ilaalada boqortooyada (Den Kongelige Livgarde) dhererkiisu ahaado ugu yaraan 175 (1 mitir iyo 75 sentimitir) taasi waxay si dadban shuruud adag iyo caqabad ugu ahayd dumarka oo sida caadiga ah raga ka gaaban. Shuruudda dhererka ee ku xiran qofka noqonaya ilaalada boqortooyada waxaa markii dambe laga dhigay 169 (1 mitir iyo 69 sentimitir) si loogu fududeeyo dumarka doonaya in ay ka mid noqdaan ilaalada boqortooyada.

Haddii aad dareentid in lagugu sameeyey fal kala soocid ama takoorid waxaan u dacwoon kartaa gudiga la dagaalanka takooridda ee lagu magcaabo "Ligebahandlingsnævnet", wixii faahfaahin dheeraad ah waxaad ka helaysaa boggan: https://ast.dk/naevn/ligebehandlingsnaevnet.

XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADYADA AASAASIGA AH
Denmark dumarka iyo raggu waxay xuquuq isku mid ah. Labaduba way ka simanyihiin xoriyadda hadalka, xoriyadda diinta iyo xoriyadda codeynta doorashooyinka. Xuquuqahan aas-aasiga waxay ka dhigan yihiin in:
1) Qof walba xor u yahay – marka laga reebo waxyaalo faro ku tiris ah- inuu yiraahdo ama qoro fekerkiisa. 2) Qof walba wuxuu dooran karaa diinta uu doonayo. 3) Sida ku qoran dastuurka dalka oo ah sharciga ugu sarreeya, qof walba codkiisa wuu ka dhiiban karaa doorashooyin.

Ragga iyo dumarkuba saamayn ayey ku leeyihiin go'aamada siyaasadeen ee lagu hago Denmark. Ragga iyo dumarka qaan-gaarka ah (ka wayn 18 sano) ee deggan dalka, waxay xaq u leehihiin in ay codkooda ka dhiibtaan doorashinka dalka. Qofkii aan haysan dhalashada daanishka wuxuu ka codayn karaa keliya doorashooyinka deegaanka, kuwa gobolada iyo doorashooyinka xildhibaanada baarlamaanka yurub. Ragga iyo dumarka doonaya in la doorto waxay isku soo taagi (sharrixi) karaan doorashooyinka. hadaba waa muhiim in qof walba oo codayn kara uu coddeeyo. Marka qof walba uu codkiisa dhiibto ayaa siyaasiyiinta soo baxda dadka oo dhan matali karaan.

Waxaad sidoo kale saamayn ku yeelan kartaa bulshada aad la nooshahay haddii aad ka mid noqotid ururada bulsho (foreninger) ama si mutadawacnimo ah uga qayb qaadatid howlaha wax tarka u leh bulshada. Sidaas darteed dadku waxay ka mid noqdaan ururada bulshada. Waxay sidoo kale ka qayb qaataan doodaha siyaasadda markaas taagan haddii ay doonayaan in ay ku lug yeeshaan arimahaas. Sidoo kale waxay ka qayb qaataan shaqooyin mutadawacnimo ah (frivilligt arbejde).

Denmark waxaa ka jira ururo badan oo kala duwan. Tusaale ahaan waxaa jira ururo ka shaqeeya arimaha isboortiga, madadaalada (hobby), siyaasadda, diinta, samafal iyo bani'aadanimada. Sidoo kale waxaa laga mid noqon karaa guddiga waalidiinta iskuulka (forældrerådet) ama xarumaha caruurta yaryar. Waxaa kaloo laga mid noqon karaa guddiga dowladaha hoose u qaabilsan is-dhex-galka (kommunernes integrationsråd) iyo ururka shirkadda guryaha ee xaafadda uu qofku deganyahay (boligforeningen).

Waxaa sidoo kale qofkii rabaa furan karaa urur isaga u gaar ah. Denmark waxaa ka jira xoriyadda ururada iyo isku-imaatinka (shirarka), taas oo macnaheedu yahay in dhammaan dadku ay xaq u leeyihiin in ay aas-aasaan ama furtaan urur. Ujeedooyinka ama ahdaafta ururka la furayo waa in aysan ka hor imanayn sharciga dalka u yaal. Dumarka iyo ragguba way u simanyihiin furashada ururada iyo ka qayb galka siyaasada waxayna fursad u haystaan in ay yeeshaan saamayn ama awood isku mid ah.

Dumarka iyo raggu waxay sidoo kale leeyihiin waajibaadisku mid ah. Dhammaan shacabka Denmark waxay lagu leeyahay waajibaadyo muwaadinimo lagana doonayo in ay gutaan. tusaale ahaan dadka oo dhan waxaa laga doonayaa in ay bixiyaan cashuurta iyo in ay dhigtaan iskuulka muddo 10 sano ah. Waalidiinta waxaa laga rabaa in ay caruurtooda masruuftaan, lamaanaha is qaba waxaa sidoo kale laga doonayaa in midba midka kale masruufo. Dhammaan ragga iyo dumarka caafimaadka qaba waxaa laga doonayaa in ay naftooda masruufaan iyo in ay shaqeeyaan si ay uga soo baxaan kaalintooda bulsho.

CADDAALAD BULSHO IYO IS AAMINAAD
Bulshada Daanishku waxay ku dhisantahay kalsooni lagu qabo wax-wada-lahaanshaha (fælleskabet), siyaasiyiinta aynu dooranay iyo madaxda mas'uulka ka ah howlaha muhiimka ah ee bulshada. Bulshadu Daanishku waxa kale oo ay ku dhisantahay kalsooni lagu qabo in bulshado intii karaankeeda ah ka qayb qaadato hor-u-marka iyo in aan ciriiri la gelin xoriyadaha dadka.

In qof walba oo muwaadin ah helo xaqiisa iyo in dadka oo dhan ay helaan caddaalad waa mas'uuliyad saaran qaybaha kala duwan ee dowlada. Mas'uuliyiinta kala duwan ee gacanta ku haya howlaha maamulka dalka waxay ka mid yihiin kuwa ugu musuq-maasuq yar caalamka. In mas'uuliyiinta dowladdu musuq ka hufanyihiin Waa arin muhiimad weyn leh, sababtoo ah waxay sahlaysaa in ay si deg deg ah wax uga qabtaan haddii qof muwaadin xuquuqdiisa lagu xad-gudbo (xataa haddii qoysku sameeyaan xad-gudubkaas).

Cadaalad bulsho ku dhisan waa bulsho:
1) Leh nidaam garsoor oo aad u' hor-marsan isla markaasna shaqaynaya. 2) Ku dhisan mabaa'diida ay yihiin: in loo simanyahay sharciga, cadaalad la hubo, kala saarista awoodaha dowladda iyo in dadku xaq u leeyihiin in ay awoodda wax ku yeeshaan. Bulshada cadaalada ku dhisan muwaadiniintu waxay leeyihiin xuquuqo iyo xoriyadu aasaasi ah. Waxaa sidoo kale bulshada waajib ku ah in ay ilaaliyaan sharciga dalka u yaal, iyaguna waxay laamaha iyo mas'uuliyiinta xilalka kala duwan haya xaq u leeyihiin in ay helaan caddaalad iyo in si wanaagsan loo dhaqmo.

ururka caalamiga ah ee lagu magcaabo World Justice Project ayaa ku dhawaaqay in sanadka 2018 Denmark kaalinta kowaad ka gashay caalamka iyadoo noqotay dalka u wanaagsan ee ay ka jirto cadaalad bulsho.

Cutubyada soo socda waxaad ka aqrin kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sinaanta ragga iyo dumarka marka ay joogaan goobaha guud, goobaha shaqada iyo qoyska dhexdiisa.

TAARIIKHDA SINAANTA EE DENMARK

sinaanta u dhexeysa ragga iyo dumarka Denmark waxay aad uga soo shaac baxday boqolkii sano ee u dambeeyey. 100 sano ka hor waxaa jirtay in dumark meelaha qaarkood aysan ragga la sinayn. Hase yeeshee arintaasi waxay ahayd mid sanad sanadka ka dambeeya horumar laga sameynayey, kadib markii dadka daanishka iyo dunida intee kaleba ay bilaabeen in ay la daagaalamaan takoorka lagu hayey dumarka. In ragga iyo dumark daanishka ahi sinmaan waxaa saameyn wayn ku lahayd guulihii ay wadamada kale ee yurubta ka gaareen la dagaalanka takoorkii lagu hayey dumarka. Sinaanta ragga iyo dumarka ka sokow Denmark waxay biirtay ama saxiiday heshiisyo iyo baaqyo caalami ah oo ay ka mid yihiin heshiiskii ilaalinta xuquuqul insaanka iyo heshiiskii xuquuqda caruurta.

Halganka loogu jiray sinaanta waxaa intii uu soo socday xoogga la saarayey dumarka iyo xuquuqdooda waayo dumarka ayaa meelo badan kaga liitay ragga. Tusaale ahaan dumarka looma ogalayn in ay codkooda dhiibtaan iyo inay isa soo sharaxaan toona. Sidoo kale in badan oo ka mid waxbarashada iyo shaqooyinka uma furnayn dumarka. Hase yeeshee sanidihii u dambeeye waxaa timi in sinaantu khusayso ragga laftigooda oo ay sinaanta xaq u leeyihiin, tusaale ahaan raggu waxay ku doodeen in fasaxyada la siiyo waalidka (forældreorlov) ay dumarka la qayb sadaaan. Kala qayb sanaanta shaqada ee u dhaxaysay ragga iyo dumarka waxaa is bedel ku yimid markii warshaduhu ka bilaabmeen Denmark qarnigii 18-aad. Hase yeeshe inta badan

shaqooyinka dumarku weli waxay hoos joogeen ragga. Sidaas darteed waxay dumarku meelo badan ka sameeyeen kacdoon ay kaga soo horjeedaan sinaan la'aanta kuna dalbanayaan in dhanka xuquuqda lagala simo ragga.

Dhaq-dhaqaaqa haweenka Daanishku wuxuu bilaabmay sanadkii 1871 ka dib markii la aasaasay ururka haweenka daanishka (Dansk Kvindesamfund). Yagleelida ururka haweenka daanishka waxaa keenay rabitaanka ay haweenku u hayeen in ay helaan xoriyad la mid ah tii ka dhalatay kacaankii Faransiiska sanadkii 1789. waxaa waqtigan inta badan diiradda la saarayey in dumarku helaan xuquuqda codbixinta. Sanadkii 1915 ayaa la meel mariyey sharci dumarka daaniska u ogolaanaya in ay codeeyaan iyo in ay is soo sharaxaan. 1920-yadii ayaa waxaa sidoo kale horumar laga gaaray in ragga iyo dumarku u sinaadaan guurka. Ragga iyo dumarku waxay tusaale ahaan ka sinmeen dhaqaalaha qoyska, mas'uuliyadda caruurta iyo furiinka.

Halganka haweenku ugu jireen sinaanta wuxuu mar labaad aad u xoogaystay dhammaadkii 1960-yadii iyo 1970-yadii xiligaasoo dumar badan ay soo galeen suuqa shaqada. Waqtigaas waxaa samaysmay dhaq-dhaqaaqii xuquuq doonka ahaa ee haweenka ee la magac baxay "Rødstrømperne". Waxyaalaha ay dumarku markaan xoogga saarayeen waxaa ka mid ahaa in ay helaan mushaharka la mid ah kan raggu qaataan, in dumarku xor u yihiin jidhkooda iyo kacdoon ka dhan ah in dumarka loo arko in loo abuuray galmo keliya.

Halgankii ay dumarku ugu jireen in ay la xuquuq noqdaan ragga wuxuu helay taageero aad u weyn waxayna sababtay isbedel lagu sameeyo shuruucda dalka. Waxaa sidoo kale wax iska bedeleen hab fekerkii dadka. Intaas wixii dambeeyey dumarku waxay meel kasta sharci ahaan (dastuur ahaan) kala sinmeen ragga. Sanidihii 1970-yadii dumarka dhalin yarada ahi waxay tiro ahaan aad ugu dhowaayeen ragga dhalinyarada ah marka laga hadlaayo ka qayb galka waxbarashada iyo shaqada. Intaas wixii ka dambeeyey waxaa soo siyaadayey ka qayb galka dumarka ee suuqa shaqada, waxaa sidoo kale hawl-gab noqday meeshana ka baxay jiilkii ugu dambeeyey dumarka ee shaqadoodu ahayd guri-joognimada.

In kastoo ay sidaas tahay marka la eego suuqa shaqada waxaa weli jira farqi u dhexeeya ragga iyo dumarka. Meelaha aysan weli dumarku si wanaagsan ragga ugala sinayn waxa ka mid ah mushaharaadka, xirfadaha iyo kala saraynta dhanka shaqada. Sidoo kale dumarka weli aad ayey ragga uguga badan yihiin shaqooyinkii ama xirfadihii dumarka lagu aqoon jiray sida xanaanaynta, tarbiyadaynta dhallaanka iyo kalkaalinta bukaanka. Sidaas si la mid ah raggu weli way kaga badan yihiin dumarka xirfadihii ragga lagu yaqaanay sida shaqooyinka gacanta laga qabto (fuundinimo, mekaanik iwm), dhaqaalaha iyo cilmi baarista. Inkasta oo horumar taariikhi la gaaray hadana farqi ayaa u dhexeeya mushaharaadka ay qaataan ragga iyo dumarka shaqeeya. Sababta ugu weyn ee keentay in raggu dumarka ka mushahar bataan ayaa ah in dumarku inta badan u shaqeeyaan laamaha kala duwan ee dowladda halka raggu inta badan u shaqeeyaan shirkadaha gaarka loo leeyahay oo ka mushaharaad badan dowlada. Sidoo kale raggu weli way kaga badan dumarka dhanka maamulka iyo madaxnimada.

Meesha keliya ee laga reebay in dumarku ragga kala sinmaan waa tababarka ama carbiska militeri ee qasabka ah (gurmadka). Carbiskan mileteri (værnepligt) waa mid laga doonayo qof walba oo rag ah marka uu gaaro 18 sano. Dumarka waajib kuma ahan in ay gutaan wax carbis ciidan.

TAARIIKHIHII UGU MUHIIMSANAA HALGANKII SINAANTA RAGGA IYO DUMARKA EE DENMARK

1683: Waxaa la meel mariyey sharci mamnuucaya in raggu dumarkooda garaacaan.

1814: Waxaa la meel mariyey sharcigii dugsiyada hoose/dhexe. Sharcigani wuxuu waajib ka dhigayey in wiilasha iyo habluhuba helaan waxbarasho.

1857: Waxaa la meel mariyey sharciyada kala ah: qaan-gaaridda, mulkiyadda ganacsiga iyo dhaxalka. Sharciga qaan-gaarnimadu wuxuu dhigayey in dumarka aan xaaska ahayni qaan-gaarayaan marka ay da'doodu gaarto 25 sano. Sharciga mulkiyadda ganacsi wuxuu dhigayey in dumarku sida ragga oo kale xor u yihiin in ay ganacsi xor ah yeeshaan. Sharciga dhaxalku wuxuu haweenka u xaq u siinayey in helaan dhaxal la mid ah midka helaan ragga qaarabada yihiin.

1875: Dumarka waxaa loo ogolaaday in dhigtaan jaamacadaha oo dhan marka laga reebo kuliyadda culuumta diinta.

1880: Dumarka xaaska ah waxay xaq u yeesheen in ay sida ay doonaan ka yeeli karaan mushaharaadkooda.

1899: Haween xaaska ah waxay la xaq xaq noqdeen kuwa aan la qabin iyadoo noloshoodana xor u noqday. Sidoo kale waxaa yaraatay awooddi ay raggu u lahaayeen in ay maamulaan hantida ka dhexaysa qoyska.

1901: Dumarka ka shaqeeeya warshahada waxay xaq u yeesheen in ay helaan 4 asbuuc oo nasiino ah marka ay umulaan. Sidoo kale waxay fursad u heleen in la siiyo caawinaad dhaqaale oo aan deyn ahayn inta ay umusha ku maqanyihiin. Intaas waxaa sii dheerayd in aysan umulnimada ku waayin xuquuqahoodii muwaadinimo.

1908: Dumarku waxay xaq u yeesheen in ay ka codeeyaan iskuna soo taagaan doorashooyinka dowladaha hoose. Haweenka carmalka ah, kuwa la furay iyo arooska ah waxay xaq u heleen mas'uuliyadda caruurtooda.

1912: Hab dhaqankii guurka ayaa isbedel lagu sameeyey taasoo meesha ka saartay balanqaadkii ay marwada la guursanayaa u samayn jirtay saygeeda ee ahayd in ay mudiic u noqonayso inta ay is qabaan.

1915: Dumarku waxay ku guulaysteen in ay helaan xuquuqda codaynta iyo is-sharixidda doorashooyinka golaha shacabka (baarlamaanka).

1921: Waxaa la meel mariyey sharci dumarka xaq u siinaya in ay qabtaan dhammaan shaqooyinka dowladda (shaqooyinka guud) marka laga reebo shaqooyinka kaniisadda iyo meliteriga.

1922: Dumarka xaaska waxay ku guulaysteen in ay in ay qaadaan mas'uuliyadda cartuurtooda inkastoo weli aabuhu yahay wakiilka caruurta.

1924: Waxaa markii u horeysay taariikhda Denmark loo magcaabay Nina Bang in ay noqoto wasiirkii ugu horeeyey oo ah qof dumar ah. Nina Bang sidoo kale waxay ahayd haweeynaydii ugu horaysay dunida oo waziir ka noqota dowlad ay dadku si xor ah u soo doorteen (dimuqraadi ah).

1948: Eva Madsen ayaa noqotay haweenaydii ugu horeysay taariikhda Denmark ee noqoto duq-magaalo. Waxaa sidoo kale noqday baadariyaddii ugu horeerey oo dumar ah Johanne Andersen, Ruth Vermhren iyo Brenneche-Petersen.

1950: Denmark ayaa yeelatay haweenkii ugu horeeyey oo qaadiyaal maxkamadeed ah.

1957: Dumarka ayaa ku guulaystay in ay sida ragga oo kale xaq u yeeshaan in ay wakiil u noqdaan caruurta.

1961: Dumarku waxay ku guulaysteen in ay sii haystaan magaca qoyskooda marka la guursado.

1966: Kiniiniga ay dumarku kaga hortagaan in ay uur qaadaan ayaa si lacag la'aan ah dumarku uga heleen Denmark.

1971: Dumarka ayaa loo ogolaaday in qortaan mileriga (ciidanka).

1973: Waxaa la meel mariyey sharci u ogolaanaya dumarka in ay ila iska soo tuuri karaan.

1976: Waxaa meel mariyey sharci dhigaya in dumarka iyo raggu isku mushahar noqdaan haddii ay qabtaan shaqo isku leeg.

1978: Waxaa la meel mariyey sharci dhigaya in ragga iyo dumarka si isku mid ah loogula dhaqmo goobaha shaqada.

1983: Fasaxa la siiyo hooyada umusha ah (barselsorlov) ayaa la dheereeyey lagana dhigay 24 asbuuc. Sidoo kale Aabaha waxaa loo ogolaaday in helo fasax waalidnimo (fædreorlov). Dumarka la qabo ayaa fursad u helay inay noqdaan ganacsato xor ah.

1985: Waxaa la meel mariyey sharci u ogalaanaya labada waalid inay wadaagaan mas'uuliyadda caruurta.

1995: Denmark markii ugu horeysay ayaa qof dumar ah noqotay taliyaha booliska dalka. Laba dumar ah ayaa sidoo markii u horaysay madax ka noqday kaniisado ku yaal dalka.

1999: Waxaa markii u horaysay dhacday in dumarka iyo ragga dhigta waxbarashada jaamacadeed tiro ahaan isleekaadeen.

2000: Waxaa la meel mariyey sharci isku mid ka dhigaya ragga iyo dumarka.

2002: Fasaxa la siiyo waalidka marka uu ilmo u dhasho (barselsorlov) ayaa la dheereeyey lagana dhigay 52 asbuuc. Aabaha waxaa xaq loo siiyey 2 asbuuc oo fasax marka uu ilmo dhasho, hooyada waxaa xaq loo siiyey 4 asbuuc umusha ka hor iyo 14 asbuuc oo ka bilaabmaysa marka ay umusho. halka 32 asbuuc ee hartayna ay wadaagayaan labada waalid. Labada waalid xor ayey u yihiin sidii ay u qaybsan lahaayeen fasaxooda.

2007: A new parental responsibility law is passed, based on both parents having equal custody of their children.

2011: Denmark gets its first female prime minister, Helle Thorning-Schmidt.

SINAANTA IYO GOOBAHA DADWEYNAHA

Ragga iyo dumarku way u simanyihiin in ay maraan goobaha guud (aan cidna gaarka u lahayn). Taas oo macnaheedu yahay in ragga iyo dumarkuba ay sida ay doonaan ugu kulmi karaan una isticmaali karaan goobaha guud. Goobaha ganacsi sida dukaamada, maqaaxiya iyo meheradaha kale ee dadku isticmaalaan waxaa ka reeban in ay macaamiishooda si kala duwan ula dhaqmaan, sida in ay u kala saaraan dadka rag iyo dumar ama isir.

Dadka oo dhan, yar iyo weyn iyaga oo aan loo kala saareyn rag iyo dumar, si xoriyad ah ayey maalin iyo habeenba marka ay doonaan u mari karaan goobaha guud ee aan cidna gaarka u lahayn. Ragga iyo dumarkuba way mari karaan goobaha aan cidna lahayn iyaga oo keligood ah, dumark iyo dumar isla socda, rag iyo rag isla socda ama rag iyo dumar isla socda. Sidaas darted waa caadi in la arko dhalinyaro rag iyo dumarba iskugu jira oo magaalada wareegaaya xilli dambe habeenada fasaxa asbuuca (sabtida iyo axadda). Sidoo kale waa arin Denmark caadi ka ah in ragga iyo dumarkuba khamriga cabbaan.

Ragga iyo dumarku waxay xaquuq siman u leeyihiin in ay fekerkooda ka sheegaan goobaha fagaaraha ah. Hashe yeeshee lama ogola gacan-ka-hadalka, qaylada, cabaadka ama buuqqa, dagaalka ama falalka sharaf dilidda ah. Sidoo kale lama ogola in uu qofku muujiyo dhaqan anshax xumo ama laga yax-yaxo oo dadku dhibsadaan ama sababa in dadku ka yaq-yaqsadaan. Falalka ay ka mid yihiin in la isugu galmoodo meel fagaare ah ama goob dad weyni waa mamnuuc. Lakin waa arin caadi ah lana ogolyahay in goobaha fagaaraha ah ama goobaha dad weynaha lamaanaha isqaba iyo kuwa aan isqabinba isku shumiyaan, hab isa siiyaan iyo weliba in ay gacanta is qabsadaan. Sidaas xataa waxaa samayn kara laba ragga ah ama laba dumarka ah.

Gacan-qaadka ama salaanta gacmaha la iska salaamaa waa sida caadiga ah ee inta badan la isku salaamo kulamada rasmiga ah ama marka dad aan is aqoon kulmaan. Marka ay laba qof kulmaan waxaa laga filayaa in ay gacanta isa siiyaan, xataa haddii ay yihiin rag iyo dumarba. Waxaa loo arkayaa akhlaaq xumo haddii aanu qofku gacan qaadin qofka uu la kulmayo.

Sidoo kale waxaa caadi ah in dadka sida gaarka isku yaqaan laabta is geliyaan marka ay kulmaan. Tusaale ahaan dumarka iyo ragga ama gabdhaha iyo wiilasha ay saaxiibtinimadu ka dhexayso ayaa laabta is gelin kara ama is taaban kara iyada oo aan wax dareen galmo ah aysan meesha oolin ama aysan wax gaar ah ka dhaxayn. Denmark waxaa caadi ah in dhalinyarada iyo dadka waaweyniba ay leeyihiin asxaab rag iyo dumar ah.



LEBISKA
Denmark ragga iyo dumarku waxay u lebisan karaan sida ay rabaan. Qof walba wuxuu xaq u leeyahay in lagu ixtiraamo lebiska uu doorto. Sidoo kale qofna laguma takoori karo lebiskiisa awgeed.

Dad badan oo ay gaar ahaan ka mid yihiin dumarka dhalinyarada ahaa ayaa iyaga oo ka faa'iidaysanaya xaqa ay u leeyihiin in ay u lebistaan sida ay doonaan waxay xirtaan maryo aan badnayn gaar ahaan xilliga kulaylka ama cawaysyada habeenkii. Dharka aan badnayn ee ay dumarkani xiranyihiin waxba kama sheegayo doorka kaga jiraan bulshada iyo akhlaaqdooda toona. Sidoo kale looma fasiran karo inay diyaar u yihiin galmo. Taas macnaheedu tahay in dumarka xidhan goonooyinka iyo toobabka gaa-gaaban ama shaatiyada gacma gaabka ah aan loo fasiran karin inay doonayaan in la taa-taabto ama in loo galmoodo. Waa dembi lagu mutaysan karo ciqaab sharci ah in la isku dayo in la taabto, shumiyo ama laabta la geliyo qof aan arintaas doonayan lebiska uu doonoba ha xidhnaadee. Waxaa jira marar kooban oo aan aanu qof xor u ahayn in doorto lebiskiisa, waxaana ka mid ah:

1) Lama ogola in qofku dhar la'aan ahaado (qaawanaan) ama uu cawradiisa ku muujiyo goobaha dad weynahu isticmaalaan (marka laga reebo xeebaha qaarkood iyo meelo gaar ah oo dadka qaawan loogu talo galay).

2) Waxaa 2018 la meel mariyey sharci ragga iyo dumarkaba ka mamnuucaya in ay wejigooda maro ku qariyaan. Mamnuucidaasi kuma jirto koofiyadaha, xijaabka ama jilbaabka. Laakin waxaa mamnuuc ah in la xidho koofiyadaha wejiga oo dhan qariya, maskaraatiga iyo indho shareerka. Inkastoo ay mamnuucidaasi jirto hadana waxaa jirta in mararka qaarkood la ogolyahay xidhadasha dharkaan.

SUUQA SHAQADA IYO SINAANTA RAGGA IYO DUMARKA

XUQUUQDA IYO WAAJIBAADKA GOOBTA SHAQADA
Ragga iyo dumarku waxay faa'iido weyn ugu yihiin bulshada daanishka. Inta badan ragga iyo dumarku way shaqeeyaan, xataa marka ay guursadaan oo caruurta dhalaan.

2017 **Tirada Ragga iyo Dumarka Shaqeeya (boqolkiiba)**
Tiro koobta Denmark



Ragga iyo dumarka da'doodu u dhexayso 15 ilaa 64 sano ayaa kuwa shaqaysta.

Denmark waa dal barwaaqo sooran ah taas oo macnaheedu yahay in waxbarashada aasaasiga, waxbarashada sare iyo daaweynta bukaanku ay yihiin lacag la'aan. Sidoo kale dadka oo dhan oo ay ku jiraan dadka xanuunsan iyo kuwa waayeelka ee hawl-gabka noqday waxaa la siiyaa masruuf ay ku noolaadaan. Bulsho hanaankan u dhisani waxay suurto geli kartaa keliya haddii dadka xoogga ahi ay shaqeeyaan oo canshuur bixiyaan. Cashuur bixinta ayaa suurta gelisay in bulshadu dhaqaaale ahaan awoodo in dalku ahaado mid barwaaqo sooran ah. Sidoo kale bulsho waxay barwaaqo sooran noqon kartaa haddii ragga iyo dumarkuba shaqeeyaan.

Sidoo kale caafimaad qaba laakiin shaqo la'aanta waxay helayaan masruuf ay ku noolaadaan. shaqo la'aantu waxay ku dhici kartaa qof walba muddo gaaban ama muddo dheer. Sidaas darteed haddii qofku noqdo shaqo la'aan isla markaasna waayo hab kale oo uu isku masruufi karo, wuxuu lacag ka heli karaa kommuunka ama sanduuqa ay leeyihiin dadka shaqo la'aantu hayso (a-kasse). Waxaase looga baahan qof walba (rag iyo dumar) oo masruuf ka qaata meelaha aan soo sheegnay inuu mar walba diyaar u ahaado haddii shaqo soo baxdo.

SUUQA SHAQADA IYO SINAANTA RAGGA IYO DUMARKA
Sharciga ayaa sheegaya in ragga iyo dumarka qaab isku mid ah loogula macaamilo goobaha shaqada. Arintan ayaa macnaheedu yahay in ay ragga iyo dumar u wada shaqeeyaan qaab isku mid ah. Waxaa reeban in marka dadka la shaqaalaysiinayo lagu doorto inay yihiin rag ama dumar. Waxa sidoo kale reeban in marka shaqaale la ruqsaynayo ama la dalacsiinayo loo eego inay yihiin rag ama dumar.

Tusaale ahaan lama ogola in marka la xayeysiinayo shaqo banaan lagu qor in shaqada la siinayo qof dumar ah ama qof rag ah keliya. Haddii qof dumar iyo qof rag oo oo u tartaraya buuxinta shaqo banaan, iskaga mid noqdaan dhanka aqoon iyo karti noqdaan, go'aanka kama dambaysta ee midkood shaqada lagu siinayo waa in aan lagu salayn nooca qofka (rag ama dumar). Waxaa reeban in shaqa-bixiyuhu uur ama fasaxa umusha dartiis shaqada ka joojiyo qof dumar ah. Shaqa-bixiyihii ku dhaqaaqa fal noocaas oo kale ah waxaa loo arkayaa in uu takoorid sameeyey. Haddii kale waa in shaqa-bixiyuhu cadeeya in ay jirto sabab kale oo qofka shaqada lagaga joojiyey. Sharciga denmark wuxuu qorayaa in dadka shaqo isku mid ah ka haya helaan mushahar isku mid ah. Taas oo macnaheedu yahay in ragga iyo dumarka fuliya shaqo isku mid ah ama shaqo is le'eg helaan mushahar isku mid ah.

In kasta oo ay tahay in ragga iyo dumarku qabta howl isku mid ah ay helaan mushahar siman, hadana weli Denmark kama jirto sinaan mushahar oo dhab ah: in kasta oo celcelis ahaan dumarku ragga ka wax ka waxbarasho sareeyaan, hadana ragga ayaa celceliska mushaharka iyo madaxnimada raggu wuu ka sareeyaa kan haweenka. Sababta keentay in raggu ka mansab iyo mushahar sareeyo ragga ayaa ah in haweenku inta badan u shaqeeyaan dowladda halka raggu u shaqeeyaan shirkahada gaarka loo leeyahay oo ka yara mushahar badan shaqada dowladda. Farqiga mushaharka ee u dhaxeeya ragga iyo dumarka ayaa ah mid sanadba sanadka ka dambeeya sii yaraanaya:

% Farqiga mushaharka (Boqolkiiba)



HAWEENKA IYO RAGGA IYO GOOBTA SHAQADA
Haweenka iyo ragga iyo goobta shaqada. Dumarka iyo raggu inta badan way ka wada shaqeeyaan goobaha shaqada ee Denmark. Madaxda shaqaaluhu waxay sidoo kale iskugu jiraan rag iyo dumar. Waa muhiim in qof walba uu la shaqayn karo dadka oo dhan rag iyo dumar nooca ay kasta ha ahaadeene. Sidoo kale waa in si isku mid ah xushmad loogu mujiyaa ragga iyo dumarka shaqaalaha iyo madaxda ah ee meel ka wada shaqeeya.

Inkastoo ay jiraan goobo shaqo iyo xirfado ay ragga iyo dumarku ku kala badanyihiin. Haddana qof walba (rag iyo dumar) wuxuu fursad haystaa in uu ka shaqeeyo shaqada uu rabo ama qaato waxbarashada uu doonayo.

Dad oo degan Denmark ayaa waxay doortaan in ay ku biiraan ururada shaqaalaha. Urur shaqaale waa urur ujeedadiisu tahay ilaalinta xuquuqda shaqaalaha iyo weliba kor u qaatista duruufaha shaqo ee shaqaaluhu ku shaqeeyan. Ururada shaqaaluhu waxay wax ka qabtaan arimo ay mid yihiin takooridda ama kala soocidda shaqaalaha dhexdooda.

Haddii aad shaqadaada ama meel kaleba kala kulantid takoorid ama in laguula dhaqmo si aan wanaagsanayn waxaad u dacwoon kartaa Guddiga Sinaan (ligebehandlingsnævnet). Waxaad Guddiga Sinaanta kala xiriiri kartaa halkan: email: ast@ast.dk; sikkermail@ast.dk ama teleefanka 33411200.

Waaxda sinaanta ee machadka xuquuqda aadanaha ee daanishka ayaa u xil saaran ka jawaabista iyo talo bixinta dacwadaha la xiriira takoorka. Faah-faahin dheeraad ah ka aqri boggooda internetka: www.menneskeret.dk/raadgivning.

Talo-bixinta la xiriirta arimaha takoorka waxaa laga xiriiri karaa telefanka: 32698666 maalmaha salaasada iyo khamiista inta u dhaxaysa 10:00 ilaa 12:00 subaxnimo iyo 01:00 ilaa 03:00 galabnimo. Waxaad sidoo kale kula soo xiriiri kartaa e-mailkan: ligebehandling@humanrights.dk

DHAQAALAHA GAARKA AH
Dhamaan dadka 18 sano waxay xaq u leeyihiin in maamushaan lacagtooda. Sidaas darteed Denmark ragga iyo dumarkuba waa in leeyihiin koonto bangi ay ugu soo dhacdo lacagta musharka ama lacagaha dowladdu bixiso. Sida caadi Denmark qof haysta shaqo waqtigeedu buuxo (fuldtidsarbejde) wxuu shaqeeyaa 37 saac asbuucii. Laakiin waxaa jira dad shaqeeya saacado intaas ka badan iyo dad intaas ka yar shaqeeya. Inta badan qoysaska caruurta leh ee labada waalidba shaqeeyaan ayaa aabaha iyo hooyado inta badan waqtigooda firaaqada la qaataan qoyskooda.

Inaad shaqaysatid waxay ku siinaysaa madaxbanaani dhaqaale iyo inaad qoyskaaga masruufatid. Shaqadu waxay kaloo ku siinaysaa saaxiibo iyo xiriir aad la yeelatid dadka aad ka wada shaqeysaan goobtaada shaqada. Qofka shaqaysta wuxuu sidoo kale bulshada dhexdeeda ka leeyahay maqaam iyo maamuus.

Mushaharka qofku shaqaysto waa mid qofka u gaar ah iyada oo aan loo eegayn rag ama dumar. Qoysas badan waxay u tahay lagama maarmaan in laba waalidba shaqeeyaan si qoysku u helo lacag masruuf ah oo ku filan. Haddii labada waalid shaqeeyaan qoysku way is masruufi karaan xataa haddii labada waalid midkood shaqo la'aan noqdo. In labada waalidka shaqeeyaan aad ayey muhiim ugu tahay qoysaska caruurta waayo caruurtu waxay u baahan yihiin dhar cusub, cunto wanaagsan iyo kharashaadka ku baxa baashaalka caruurta xiliyada ay firaaqada yihiin si ay ula jaan qaadaan asxaabtooda.

Marka dumarka iyo raggu shaqeeyaan waxaa lagama maarmaan ah in la qaybsado shaqada guriga sida nadaafada, cunto karinta, haynta caruurta, dayactirka guriga iwm. Ragga iyo dumarkaba waxaa waajib ka saaranyahay ka qayb qaadashada masruufka qoyska. Sidaas darteed waa in ay shaqada guriga si le'eg u kala qaybsadaan. In kasta ay sidaas tahay haddana aad ayey u kala duwantahay sida qoys walba u qaybsado shaqada guriga.

In kasta oo Denmark dumarka iyo ragguba shaqeeyaan kana wada qayb qaataan masruufka qoyska, haddana dumarka ayaa qabta inta badan shaqada guriga. Farqiga u dhexeeya ragga iyo dumarka marka laga hadlaayo shaqada guriga ayaa ah mid sanadba sanadka ka dambeeya sii yaraanaysa.

Marka qofku soo dego Denmark isla maasna deganaado ugu yaraan 10 sano, kadib markii ay u buuxsantay da'da 15 sano jir, dumarka iyo ragguba waxay marka ay gaboobaan xaq u leeyihiin lacagta howl-gabka (folkepension). Lacagta howl-gabku waa lacag ay dowladdu si gaar ah u siiso dadka gaaray da'da howl-gabnimada. Da'da ugu horraysa ee lagu gaaro howl-gabnimada waa 65 sano jir. Lacagta howl-gabnimada ee qofku helayo waxay ku xirantahay inta sanno ee qofku deganaa Denmark. Haddii qofku yahay qof soo shaqayn jiray wuxuu sidoo kale sida caadiga ah helayaa lacag howl-gabnimo oo la siiyo qofkii shaqayn jiray (arbejdsmarkedspension). Sidaas darteed qofka shaqayn jiray lacagta howl-gabnimada ee uu helayo way ka badan tahay tan qofka aan shaqayn jirin.

FASAXA WAALIDKA CARUURTA LEH
Denmark waxaa la isku dayey in la sameeyo nidaam fursad u siinaya ragga iyo dumarka in ay shaqaystaan iyagoo isla markaasna wadanaya nolosha qoyska.

Marka reerka u dhasho ilmo, hooyada iyo aabaha waxay tusaale ahaan xaq u leeyihiin in ay shaqada ka qaataan marka isku geeyo 52 asbuuc oo fasax ah si ay u xanaaneeyaan waqtina ula qaataan ilmahooda iyagoo isla markaasna helaya mushaharkoodii ama lacagta la siiyo waalidka ilmaha dartiis fasax u qaata (barselsdagpenge). waxaa mudan in la ogaado in mushahar ama lacagta caawinaada ah la siinayo keliya qofka shaqaysta ama waxbarasho ku jira ama qof loo ogolyahay lacagta shaqo la'aanta (dagpenge), cayrta (konthjælp) iyo wixii la mid ah. Qofkii doorta in uu noqdo guri joog ka hor inta aanu ilmuhu dhalan, ma helayo wax lacag ah.

52-da asbuuc waxaa loo qaybinayaa sidan:

1) Hooyadu waxay xaq u leedahay fasax 4 asbuuc ah oo ka horeysa taariikhda loo qabtay in ay umusha (gravitetsorlov).

2) Isla marka uu ilmuhu dhasho hooyadu waxay xaq u yeelanaysaa 14 asbuuc oo fasax (barselsorlov)

3) Marka uu ilmuhu dhasho aabuhu wuxuu xaq u leehay 2 asbuuc oo fasax ah. Aabuhu waa in uu fasaxan 2-da asbuuc ah qaataa inta aanu ilmuhu gaarin 14 asbuuc.

4) 32-da asbuuc ee soo haray labada waalid ayaa sida ay rabaan u qaybsanaya.

In kasta oo ay yara caadi noqotay in raggu qaataan fasaxa waalidka ilmuhu u dhasho, dumarka ayaa weli qaata inta badan fasaxa waalidka. Sanadkii 2014 aabayaasha daanishka ee caruurtu u dhalatay waxay celcelis ahaan la qaateen caruurtooda yar yar 29,5 maalmood oo fasax ah, halka hooyooyinkuna la qaateen caruurtooda 296,3 maalmood oo fasax ah.

2017 **CELCELISKA SIDA AY WAALIKU U QAYBSADAAN FASAXA WAALIDKA.** (Boqolkiiba)



In kasta oo dumarku ay waqti badan ku isticmaalaan koriimada iyo xanaanaynta caruurta haddana arintaas looma fasiran karo in raggu aysan ka qayb qaadan howlaha xanaanaynta iyo korinta caruurta. Berigii hore waxay ahayd arin iska caadi ah in aabuhu u shaqeeyo qoyska isla markaasna xil wayni ka saarnaa dhaqaalaha qoyska, halka hooyaduna ku howlanaan jirtay mas'uuliyadda gurigga iyo caruurta. Xilligan xaalku waa mid sidaas ka duwan. Waqtigan hadda la joogto labada waalidba waxaa laga sugayaa in ay shaqeeyaan iyo in ay si wada jir ah u qaadaan mas'uuliyadda gurigga, xanaanynta iyo tarbiyadda caruurta. Shaqada caruurta ee waalidku qabtaan waxaa ka mid ah: in ilmaha la geeyo lagana soo qaado goobaha dhallaanka lagu hayo maalintii (daginstitutioner), diyaarinta ilmaha subaxdii inta aan la gayn goobaha xanaanada, in waqti lala qaado gelinka dambe marka waalidku shaqada ka yimaado iyo in la seexiyo fiidkii. Denmark caruurtu waxay xaq u leeyihiin in waqti la qaataan labada waalidba.

Marka ilmuhu dhasho waxaa soo booqata kalkaaliso caafimaad (sundhedsplejerske) waxayna hooyada siisaa talooyin wax ku ool ah oo la xiriira caaficaadka iyo koriimada ilmaha. Kalkaalisada caafimaadku waxay hooyadii danaynaysa la xiriirsiinaysaa guruub ama koox ay ku jiraan hooyooyin sideeda oo kale dhowaan umulay. Kooxdan hooyooyinka ah ayaa kulma qiyaas ahaan asbuucii hal mar waxayna ka sheekaystaan nolosha hooyanimada iyo caruurtooda yar yar. Waxaa sidoo kale meelo badan oo dalka ah ka jira guruubo ay leeyihiin aabayaashu in kasta oo aanay weli sida kuwa hooyooyinka u soo caan bixin.

Waalidka shaqeeya waxay xaq u leeyihiin in ay qaataan maalin fasax ah oo mushahar leh haddii curuurtoodu xanuunsato. Qoyska ayaa go'aansanaya labada waalid qofka fasaxa qaadanaya. Haddii jirada ilmuhu qaatado maalmo badan, waalidku waxay raadsan karaan qof kale oo ilmaha guriga ugu haya.

WAXBARASHADA
Waa muhiim in ragga iyo dumarka qaataan waxbarasho si ay noloshooda u mareeyaan. Waxbarasho la'aan waxaa tusaale ahaan adkaanaysa in shaqo la helo.

Ragga iyo dumarku waxay xaq u leeyihiin ay helaan waxbarasho. Dumarka iyo raggu waxay si isku mid ah u geli karaan waxbarashada. Ma jirto maado dumarku ragga kaga haboon yihiin ama mid raggu dumarka kaga haboon yihiin. Taas macnaheedu waxaa weeye in dumarka iyo raggu xor u yihiin in ay doortaan waxbarashada ay doonayaan haddii ay buuxiyaan shuruudaha ku xiran waxbarashada ay dalbanayaan. In qofka loo ogolaado waxbarashada uu doonayo waxay ku xiran aqoonta iyo khibradda qofka.

Denmark inta waxbarashu waa lacag la'aan (bilaash). Dumarka iyo raggu marka ay gaaraan 18 sano waxay xaq u leeyihiin in helaan lacagta lagu caawiyo ardayda. Lacagta dowladdu ku caawiso ardayda waxaa ardayga la siiyaa inta uu waxbaranayo. Lacagtaasi ma ahan deyn.

Waqtigan tirada dumarka qaata waxbarashada way ka badanyihiin ragga. Sidoo kale heerka waxbarasho ee dumarka ayaa ka saraysa tan ragga. Xataa marka laga hadlayo dhalinyada ka soo jeeda qowmiyadaha kale ee degan dalka, dumarku dhanka waxbrashada way kaga horreeyaan ragga. In kasta oo ragga iyo dumarkuba qaadan karaan waxbarashada ay doonaan, hadda weli waxaa jira kala in ragga iyo dumarku ku kala duwan yihiin dookhooda waxbarasho. Hase yeeshee kala duwanaanshaha dookha waxbarashada ee ragga iyo dumarka ayaa ah mid sii yaraanaya. Kala duwaanashaha dookha waxbarasho ee dumarka iyo raggu waxay saamayn ku yeelataa mustaqbalkooda shaqo iyo heerka mushaharka ay heli doonaan. Waxay sidoo kale saamayn guud ku yeelanaysaa bulshada, waayo haddii aynu tusaale u soo qaado macalimiinta tarbiyeysa caruurta ee ka howlgala goobaha lagu xanaaneeyo dhalaanku waxay u badan yihiin dumar, sidaas darteedna waxaa adkaanaysa in caruurto helaan barbaariyaal ku dayasho mudan (rollemodeller) oo rag ah.

HAB DHISMEEDKA QOYSKA

NOOCYADA QOYSKA, GUURKA IYO WADA NOOLAANSHAHA.
Denmark qofku rag ama dumar kuu doono ha ahaadee wuxuu xaq u leeyahay in uu guursado qofkuu doono. Dhammaan dadka is guursada waxay isku guursasdaan jacayl dartiis. Qofka wuxuu jeclaan karaa isla markaasna guursan karaa ka nooc duwan (rag iyo dumar) ama qof la nooc ah (dumar iyo dumar ama rag iyo rag). Taas oo macnaheedu yahay in laba qof oo isku nooc ah ay isku guursan karaan kiniisadda iyo gurriga degmadaba (rådhuset).

Dhammaan dadku waxay xaq u leeyihiin in ay dhistaan qoyska iyagu jecel yihiin in ay dhistaan. Sida caadiga denmark qoysaska ay dadku u badanyihiin waa qoys ka kooban qof rag iyo qof dumar ah, kuwaas oo leh ama aan lahayn caruur.

Tiro u dhiganta 76,5 % waalidka caruurta leh waa kuwo is qaba. Lakin Denmark waxaa jira qoysas noocyo kale ah oo badan. Qoysaska oo dhammi maahan kuwo is qaba ama guur ka dhexeeyo. Inta badan lamaanayaasha waa kuwo wada degan ka hor inta aanay is guursan. Halka lamaanayaasha qaarkood doortaan in aysan weligood is guursan lakin wada deganaadaan. Waa caadi in lamaanuhu caruur isku dhalaan iyaga oo aan is qabin. Guud ahaan guurka looma arko lagama maarmaan, qof walbana wuu la noolaan karaa qofka uu doono. Inta badan dadka waxaa guurka ugu muhiimsan in lamaanuhu iskula dhaqmaan una wada noolaadaan si xushmad iyo qadarin leh.

Dad badan ayaa inta aysan guursan ka hor la xiriir la soo yeeshay lana soo nooladay dad badan. Dadka qaar ayaa is guursada oo hadana is fura, oo mar labaad guursada qof kale. Qoysas badan ayaa labada lamaane ama midkood waxay haystaan caruur ay dad kale u soo dhaleen. Sidaas darteed waxaa dhacda in qofku waalid u noqdo caruur aanu dhalin.

Qoysaska qaarkood ayaa waxaa meel wada degan qoys ka kooban awoowe iyo ayeeyo, aabe iyo hooyo iyo caruurtooda, dadka qaarkoodna waxay doortaan in ay keligood meel degaan.

GUURKA IYO ANSAXIISA

Guurku waa heshiis ay laba qof ku heshiiyeen. Sidaas darteed Denmark ragga iyo dumarku marka ay isguursadaan waxay leeyihiin xuquuq iyo waajibaad is le'eg. In kasta oo ay is qabaan hadana ninka iyo xaaskiisu qof walba noloshiisa isaga ayaa ka mas'uul ah. Taas oo macnaheedu yahay in labaduba xaq u leeyihiin in ay xor ahaadaan. Tusaale ahaan qofku isaga ayey khusaysaa waxa uu samaynayo maalintii, dharka uu xiranayo iyo cidda uu la kulmayo.

Waxaa jirta in ninka iyo xaaskiisa ay qofba qofka kale xil ka saaranyahay. Labadaba waxaa tusaale ahaan waajib ka saaranyahay in midba midka kale masruufo iyo weli inay masruufaan caruurtooda. Taas oo macnaheedu yahay in labaduba ka wada qayb qaataan sidii qoyskoodu u heli waxay u baahanyihiin sida cunto, dhar iwm.

Si guurku u noqdo mid sharci ka ah Denmark waa in ay ogolaadaan mas'uuliyiinta shaqada ku leh arihama guurka. Sida uu sharcigu qabo, guurka waxaa ka ratibmaya xuquuqo iyo waajibaad ay isku yeelanayaan lamaanaha is guursanaya, sidaas darteed waa lagama maarmaan in guurku dhanka sharci ansax ka yahay.

Guur sharci ahaan ansax ah waxaa loo la jeedaa in labada qof ee isguursanayaa hor yimaadaan mas'uul dowladda ogolaansho ka haysta sida duqa madaalada ama wadaadka kiniisadda. Lamaanuhu waxay sidoo kale dooran karaan in ay isku guursadaan aqalka degmada (rådhuset). waxaa intaas dheer in ay jiraan kiniisado, masjidyo iyo macaabidda yuhuuda (synagog) dowladda ka haysta ogolaansho ay dadka iskugu guurin karaan. Waxaa sidoo kale goobo kuwaas la mid ah oo guurka ay sameeyaan uusan sharci ahaan ansax noqonayn.

Haddii lamaanaha is guursanayaa u tagaan wadaad diimeed aan dowladda ka haysan ogolaansho sharci, guurkaasi ma noqonayo mid sharci ahaan sax ah. lakin dowladda hoose (kommune) ayaa qaab sharciga waafaqsan u ansixin karta guur diimeedyada. Lamaanahu way ka soo codsan karaan dowladda hoose (kommune) haddii ay doonayaan in guur diimeedkooda si sharciga dalka waafaqsan loogu ansixyo.

Bogga wasaaradda kiniisadda ayaa laga heli karaa liiska goobaha haysta ogolaanshaha dowladda ee la iskuna guursan karo si sharciga waafaqsan.
http://www.kirkeministeriet.dk/officielt/trossamfund.htm

Dadka isku soo guursada dalka dibadiisa, waa in ay guurkooda ka sharciyeyaan Denmark. sida caadiga dowladda hoose (kommuunka) ansixiya waraaqaha guurka ee dibada lagala yimid si guurkaasi sharci uga noqdo Denmark.

Waa muhiim in labada qof ee is guursanayaa si ikhtiyaarkooda ah isku guursadaan. Taas oo macnaheedu yahay inaan qofna lagu qasbin ama lagu cadaadin guurka. Sidoo kale waa in labada qof ee is guursanayaa ay wada joogaan goobta uu ka dhacayo guurkoodu. Waqtiga guurku dhacayo waa in labada qofba yihiin dad talo ka go'do oo qaan gaar ah. Sharciga daanishka ayaa dhigaya in laba qof is guursan karaan keliya haddii ay iyagu sidaas doonayaan. Sidoo kale sharciga ayaa shuruud ka dhigaya in qof jiro 18 sano, si loo ogaado in qofku ku guursanayo ikhtiyaarkiisa.

Sharciga dalka iyo dhaqanka shacabka daanishkuba waxay guurka u arkaan in uu yahay heshiis u dhexeeya laba qof. Sidaas darteed qofna ma guursan karo wax ka badan hal qof.

Sharciga Denmark ma ogola in qofku guursado wax badan hal qof. Haddii qofku si ula kac ah u guursado dhowr qof isagoo weli ku xiran qof kale, waxaa sharcigu ogolyahay guurkii hore keliya, qofkuna wuxuu mutaysan karaa ciqaab sharci ah iyadoo lagu eedaynayo in uu guursaday wax badan hal qof. Qofkii lagu heli in uu guursado wax ka badan hal qof wuxuu mutaysan karaa ilaa 6 san oo xarig ah.

SI GUURKU SHARCI UGA NOQDO DENMARK WAA IN LAGA HELAA SHURUUDAHAN SOO SOCDA:

- Waa in ay ogolaataa dowladda Denmark.
- Waa in guurku ikhtiyaar iyo wakiil la'aan.
- Labada qof waa in da'doodu ka wayntahay 18 sano marka ay is guursanayaan.
- Labada qofba waa in aysan guur kula jirin qof kale.
- Lamaanaha is guursanaya waa in aysan ka dhexayn xiriir dhow oo ehelnimo ah sida waalid iyo caruurtiisa, awoowe/ayeeyo iyo caruurta ay awoowaha/ayeeyada u yihiin ama walaalo kala bah ah.

In aad sharci ahaan qof xaas ah uga diiwaan gashantahay Denmark, waxaad ka hubin kartaa bogga internetka borger.dk ee hoos taga diiwaanka guud ee lagu qoro dadweynaha daanishka.

GUUR KHASAB AMA JAJUUB AH

In qofku si xoriyad ah u doorto guurka waxay ka dhigantahay in ay dembi tahay in qofka lagu khasbo in uu guursado qof aanu doonayn in uu guursado.

Xeerka ciqaabta daanisha § 260, faqrada 2aad ayaa sheegaya in lagu xukumi karo ilaa 4 sano oo xadhig ah qofkii qof kale ku qasba guur aanu doonayn, iyadoo la adeegsanayo waxyaalaha hoos ku qoran:

1) Xoog ama hanjabaad xoog adeegsi ah
2) Hanjabaad in bur-burin loo geysanayo hantida gaar ka ah ee qofka
3) In xoriyadda laga qaadayo ama loogu hanjabo in sharaftiisa wax loo dhimayo ama sirtiisa la faafinayo.

Guurka khasabka ah wuxu noqonayaa sharci darro iyadoo aan loo eegayn in ay samaysay goob ogolaansho ka haysata dowladda (juridisk gyldige ægtskaber) iyo in uu sameeyey wadaad diimeed (religiøse vielser).

GUURKU WUXUU NOQONAYAA KHASAB HADDII AY JIRTO MID AMA KA BADAN OO KA MID AH WAXYALAHA HOOS KU QORAN:

- In dad kale kuu dooraan qofka aad guursanaysid
- In dad kale go'aamiyaan xilliga aad guursanaysid
- Haddii lagaa talo gelin waayo go'aamada la xiriira guurkaaga.
- In aad ka cabsi ka qabtid saamaynta ay kugu yeelan doonto haddii aad diidid guurka.
- In meherka ku dhaco qaab jajuub ah
- In ay meherka samayso cid weli ama wakiil kuu ah.

Guurka si aan khasab ama jajuub ahayn dadka kale kuugu soo qorsheeyeen waa la ogolyahay.

GUURKA SI AAN KHASAB AHAYN LOO SOO QORSHEEYEY WAAN IN LAGA HELAA SHURUUD-AHA SOO SOCDA:

- In qolo kuu soo jeediso ama kugula taliso inaad qof guursatid
- In aad go'aanka guurka wax ku leedahay
- In aad diidi kartid guurka adiga oo aan waxba ka cabsanayn
- In aad guursatid marka aad adigu go'aansato
- In aad si ikhtiyaar ah u timaado goobta meherku ka dhacayo

QODOBKA § 24 EE SHARCIGA GUURKA

Guurka waxaa lagu baabi'in karaa xukun maxkamadeed haddii labada qof ee is guursday midkood laga helo arimaha soo socda:

1. Haddii ay jirtay waqtigii guurku dhacayey duruuf keeni karta in qofku aanu gaari karin go'aan sax.
2. Haddii qofka lagu khasbay guurka
3. Haddii si khalad ah qofka loogu guuriyey qof kale oo aan ahayn qofkii uu rabay ama qofku aanu diyaarba u ahayn in uu guursado.
4. Haddii labada qof ee guursanaya, qof ka mid ah guurka lagu geliyey si khiyaano ah, iyadoo qofka loo sheegayo macluumaad khaldan ama si khiyaano ku jirto looga qariyo runta iyo xaqiiqda, sidaas darteedna qofka lagu hodo guur aanu galeen hadduu ogaan lahaa xaqiiqda dhabta ah ee la xiriirta qofka uu guursanayo qofka uu yahay ama ahaan jiray. Sidaas darteed guurkani ma noqonayo sharci sababtoo ah wuxuu ku dambayn karaa fashil marka runtu soo baxdo.

Haddii qofku dareemo in lagu khasbay guur aan raali ka ahayn, wuxuu caawin ka heli dowladda hoose (kommuunka) ama wuxuu meel kasta oo uu joogo soo wici karaa talefoonkan 70203 082. Telefoonkan waxaa la soo wici karaa maalin iyo habeen (24 saac) iyadoo dumarka, ragga iyo qaraabadu ka heli karaan talo bixin la xiriirta guurka khasabka ah. waxaa sidoo kale lambarkan soo wici kara dadka ay tacadiyada u geystaan dadka ay la leeyihiin xiriirka dhow iyo sidii qofkaas loogu soo rari lahaa xarunta dadka tacadiyada ka soo carara (krisecenter). Faah-faahinta ka aqri halkan: www.levudenvold.dk

Dumarka iyo ragga dhalinyarada ah waxay sidoo kale la soo xiriiri karaan telefoonka ururka Etnisk Unge oo lambarkiisu yahay 70277666. Qaybta talo bixinta waalidiinta ee Etnisk Ung waxaa lagala soo xiriiri karaa telefonka 70270366. Faah-faahinta ka aqri halkan: www.etniskung.dk

MAS'UULIYADDA WAALIDKA

In waalidku mas'uul ka noqdo ilmo waxay la macne tahay in mas'uuliyadi ka saarantahay in ilmuhu helo dhaqaalaynta uu u baahanyahay iyo qofku qaadan karo go'aanada dantu ugu jirto ilmaha.

Marka ilmo yar u dhasho lamaane is qaba, waxay si toos ah wadajir u helayaan mas'uuliyadda ilmaha. In labada waalid si wadajir ah u helaan mas'uuliyadda ilmaha waxay ka dhigantahay in waalidku ay wadaagaan mas'uuliyadda ilmaha iyo in ay si wadajir ah xil isaga saaraan sidii ay u dabooli lahaayeen baahida aasaasiga ah ee ilmaha, in ilmuhu helo dhaqaalayn ku filan, in ilmuhu iskuulka yimaado iyo in ilmuhu helo waxyaalo uu ku baashaalo xilliga uu firaaqada yahay. Labada waalidba sidoo kale way u simanyihiin talada ilmaha iyo inay si wadajir ah u gaaraan go'aamada ay u qaadayaan ilmaha sida tusaale ahaan go'aamada la xiriira xarunta xanaanada iyo iskoolka ilmuhu dhiganayo.

Haddii labada waalid aysan qabin way wadaagi karaan mas'uuliyadda ilmaha haddii ay si qoraal ah ku balan qaadaan in ay si wadajir ah u qaadayaan xanaanaynta iyo mas'uuliyadda ilmaha. Balan qaadka ay labada waalid sameeyaan waxaa la gelinayaa diiwaanka ama galka ilmaha.

Hadii lamaane aan is qabin aanay dhalashada ilmaha ka hor ku balamin in ay wadaagaan mas'uuliyadda ilmaha, hooyada ayaa isla markaba la siinayaa mas'uuliyadda ilmaha oo dhamaystiran. Sidaas darteed si aabuhu u helo xaqa uu u leeyahay in uu wax ku yeesho talada ilmaha, waa muhiim in uu dhalashada ilmaha ka hor isku qoro in uu hooyada la wadaagayo mas'uuliyadda ilmaha.

In Ilmaha dalka dibadiisa loo saari karo iyo goormaa la ogolyahay, waxay ku xirantahay qofka ilmaha mas'uulka ka ah. Haddii aadan hubin inaad ilmaha la dhoofi kartid iyo in kale waxaad waydiin karaa xafiiska dowladda u qaabilsan maamulka (statsforvaltning), waxaad ka wici kartaa lambarkan: 72567000.

GUURKA IYO DHAQAALAHA

Denmark marka ay laba qof is guursadaan waxay si toos ah u wadaagayaan wixii hanti ah oo wada dhexaysa. Taas oo macnaheedu yahay in wax walba wadaago inta la is qabo. Lakin waxay sidoo kale ka dhigantahay in qof walba wixii la gaar ula baxayo marka la is furo ama la kala tago.

Qof walba isaga ayaa mas'uul ka ah alaabta uu horay u haystay guurka ka hor iyo alaabta uu sida gaarka ah u gatay intii la is qabay. In kasta oo la isqabo misena dumarka iyo raggu waxay xaq u leeyihiin in qof walba keligiis u madaxbanaanaado lacagta uu shaqaystay iyo in uu maamusho koontadiisa bangiga. Hase yeeshee sida caadiga way kala duwantahay habka qoys walba qaabka ay u qaybsadaan mas'uuliyadda iyo dhaqaalahaba.

Lamaanaha isqabaa sida caadiga ah wax ayey wada leeyihiin. Lakin waxaa sidoo kale guurka ka hor lamaanuhu ku heshiin karaan in qof walba gaar wax u yeesho. Gaar wax-u-lahaansho waxaa loola jeedaa in qof walba qorto alaabta uu leeyahay iyo in aysan jirin wax la kala qaybiyo haddii furiin yimaado ama la kala tago.

KALA TEGID IYO FURIIN

Dumarka iyo ragguba denmark waxay xaq u leeyihiin in ay furiin dalbadaan, iyadoo aan loo eegayn in lamaanaha kale furiinka raali ka yahay iyo in kale. Ragga iyo dumarkuba sharci ahaan way u simanyihiin furiinka. Taas oo macnaheedu yahay in labaduba ay si isku mid ah siman midba midka kale u furi karo iyo in ay u simanyihiin sharciyadda lamaanaha is fura loogu qaybiyo daymaha iyo hantida ka dhexeysa. Haddii ay caruuri ka dhexayso lamaanaha is furay, sida caadiga ah waxaa labadaba marka ay is furaan dhexaynaysa mas'uuliyadda caruurta.

Marka la is furo waa in lagu isku afgarto in hal qof qaadayo ma'suuliyadda ilmaha iyo in labada waalidba wadaagayaan mas'uuliyadda caruurta. Sidoo kale waa in labada waalid isku afgartaan sidii ay u qaybsan lahaayeen haynta caruurta. Sidoo kale waa in la isku afgartaa masruufka caruurta (børnebidrag) iyo labada lamaane ee is furay hadba kan dhaqaale ahaan liita (ægtefællebidrag). Waa sidoo kale laga heshiiyaa qofka ku haraya guriga iyo kan guuraya. Haddii labada qof isku afgaran waayaan arimaha kor ku xusan waxay talo bixin heli karaan xafiiska dowladda u qaabilsan dhanka maamulka (statsforvaltningen).

Labada qof way is furi karaan isla markaba haddii ay ku heshiiyaan furiin, umana baahna in ay ka soo fekeraan furiinka iyo in kale (separation). Waxay codsigooda furiinka u gudbin karaan xafiiska dowladda u qaabilsan dhanka maamulka (statsforvaltningen) si loogu ogolaado furiinka. Haddii labada qof rabaan furiin deg deg waa in ay ku heshiiyaan qofka u haraya gurigii ay wadaageen iyo mas'uuliyadda iyo masruufka ilmaha.

Haddii mid ka mid ah labada qof keliya doonayo furiin, waxaa si rasmi ugu bilaabanaysa 6 bilood ah oo kala tag ah (separationsperiode), si uu uga soo fekero go'aanka furiinka uu qaatay. Mudada kala-tagga ee la kala maqanyahay (separationsperiode) lama ogola in labada qof hal meel wada deganaadaan. Mudada kala-taggu waa muddo tijaabo ah oo qofku kaga soo fekerayo go'aanka uu ku gaaray furiinka. Mudadani waxay sidoo kale qofka fursad uu kaga fekero u siinaysaa in uu ku adkaysto go'aankiisii furiinka iyo in uu dib uga noqdo isla markaasna sii wato noloshiisa guurka. Muddada kala-maqnaanshaha ma jirayo waajibaadkii horay u saarnaa labada qof ee ahaa in aan gogol-dhaaf la sameyn. Sidoo kale labada qof isma dhaxlayaan, qof walbana isaga ayaa hantidiisa u madax banaan. Lakin inta lagu guda jiro mudada kala-maqnaanshaha ama kala-tagga ee 6-da bilood ah, labada qof midna looma ogola in uu guursado dad kale.

Marka ay dhamaato mudada rasmiga ah ee kala-maqnaanshaha ayaa labada qof is furi karaan, iyadoo aan loo eegayn in labada qof isku raacsanyihiin furiinka iyo in kale. Qofka/lamaanaha furiinka dalbanaya waa inuu soo gudbiyaa codsi cusub oo furiin ah. Marka labada qofba helaan waraaqaha furiinka, ayaa qofkii doonayaa guursan karaa dad kale.

Waxaa Jira Duruufo Keeni Kara In Isla Markaba La Is Furo. Waxaana Ka Mid Ah Haddii Ay Jirto Mid Ama Ka Badan Waxyaalaha Hoos Ku Qoran:

- Haddii labada qof mid ka mid sameeyo gogol-dhaaf.
- Haddii labada qof mid ka mid ah loo geyso tacadi (garaacid iwm)
- Haddii mid ka mid ah labada qof si aan sharciga waafaqsanayn dalka uga saaro ilmaho ka dhexeeya labada qof
- Haddii la ogaado in labada qof mid ka mid ah ay isqabaan dad kale (xaas badane)
- Haddii labada qof aanay isla noolayn labadii sano ee ugu dambeysay

Xasuusnow in aadan furiin ku heli karin shuruucda furiinka ee daanishka, haddii aanu guurkaagu ka sharciyeysnayn Denmark. Haddii aanu guurkaagu ka sharciyeysnayn denmark, waad heli kartaa furiin laakin waxaa la raacayaa shuruucda furiinka ee dalkii aad ku soo guursatay. Waxaa iyana mudan in la ogaado waxyaalaha furiinka ka dhalan kara sida: haddii labada qof ee isfuray qof ka mid ah lagu keenay qaabka isku-keenidda qoyska (familiesammenføring) isla markaasna aanu qofku haysan deganaanshaha rasmiga (permanent opholdstilladelse), furiinka labada qof waxa ka dhalanaya in dalka laga tarxiilo ama laga saaro qofkii la keenay.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan furiinka waxaad waydiin kartaa xafiiska dowladda u qaabilsan dhanka maamulka (statsforvaltning) waxaana laga wici karaa telefonka 72567000. waxaad sidoo kale faah-faahin dheeri ka aqrin kartaa www.statsforvaltningen.dk, boggan internetka waxaa sidoo kale laga heli karaa foomamka lagu codsado furiinka. Dhammaan codsiyada furiinka waxaa lagu soo gudbiyaa qaab elektarooni ah (online).

DHAQAALAHA MARKA LA ISFURO

Marka la isfuro ama lagu jiro mudada kala-maqnaanshaha (separationsperiode) waxaa meesha ka baxaya wax wada-lahaanshihii ka dhexeeyey labada qof. Waxaa sidoo meesha ka baxaysa xuquuqdii uu qofba qofka kale ugu lahaa dhaxalka haddii geeri dhacdo. Marka la isfuro ama la kala maqanyahay, labada qof ma qaybsanayaan haddii deyn lagu leeyahay labada qof midkood. Sababtoo ah marka la isfuro ayaa labada si siman loogu qaybinayaa wixii hanti ah ee ka dhexaysay. Sidaas darteed deynta la qaybsan maayo lakin waxaa bixinaya qofkii qaatay deynta.

TUSAALE 1

Marka la is qabo

Lillian		Thomas	
Hanti	75.000kr	Hanti	100.000kr
Deyn	-150.000kr	Deyn	-25.000kr
Wadarta guud	-75.000kr	Wadarta guud	75.000kr

Alaabta labada qof wadaagaan 75.000 kr.

Marka la is furo

Hanti	37.500kr	Hanti	37.500kr
Deyn	-75.000kr		
Wadarta guud	-37.500kr		

TUSAALE 2

Dadweynaha

Lillian		Thomas	
Hanti	250.000kr	Hanti	175.000kr
Deyn	-100.000kr	Deyn	-55.000kr
Wadarta guud	150.000kr	Wadarta guud	120.000kr

Alaabta labada qof wadaagaan
150.000 kr.
120.000 kr.
270.000 kr.

Marka la is furo

Hanti	135.000kr	Hanti	135.000kr

Marka labada qof is qabaan waxaa xil ka saaranyahay inay is masruufaan. Haddii labada qof dhaqaale ahaan aad u kala hooseeyaan, waxay marka ay isfuraan ama inta ay kala maqanyihiin lagu heshiin karaa in muddo sannado ah dhaqaale ahaan weli la caawiyo labada qof qofka dhaqaalihiisu hooseeyo (ægtefællebidrag). Haddii labada qof ku heshiin waayaan dhaqaalaha lagu taageerayo qofka dhaqaalihiisu liito, waxay xafiiska dowladda u qaabilsan arimaha maamulka (statsforvaltingen) ka codsan karaan caawinaad la xiriirta sidii loo qiimayn lahaa in labada isku leeyahay taageero dhaqaale (ægtefællestøtte) iyo in kale. Qiimaytan waxaa lagu salaynayaa dakhliga soo gala labada qof.

MAS'UULIYADDA CARUURTA MARKA LA IS FURO

Labada waalidba sidii hore ayey u sii haysanayaan mas'uuliyadda caruurta marka la is furo ama la kala maqanyahay. Inta badan lamaanaha isqaba ayaa wadaaga mas'uuliyadda ilmaha waxayna isku af gartaan go'aamada muhiimka u ah nolosha ilmaha. Sidaas darteed marka lamaanuhu is furaan, caruurtu waxay xaq u leeyihiin in ay arkaan labadooda waalid.

Haddii hal qof leeyahay mas'uuliyadda ilmaha isaga ayaa qaadanaya go'aamada la xiriira ilmaha. Waalidka is furay waa in ay si wada jir ah, iyagoo ka qayb gelinaya ilmaha, ugu balamaan sidii ilmuhu waqti ula qaadan lahaa labada waalid. Tusaale ahaan waa in ay ka tashadaan halkii

ilmuhu degi lahaa. Marka ilmuhu gaaro 12 jir, go'aanka ku saabsan qofka ilmuhu la noolaanayo, waxaa talada lagu darayaa rabitaanka ilmaha

Haddii labada qof ku heshiin waayaan mas'uuliyadda ilmaha iyo waqtiga waalid walba la qaadanayo ilmaha, waxay talo waydiisan karaan xafiiska dowladda u qaabilsan arimaha maamulka (statsforvaltningen). Talooyinka waxaad ka helaysaa halkan:
http://boernogsamvaer.dk/raadgivning/

Marka waalidku is furaan labada waalidba waxaa mas'uuliyad ka saarantahay masruufka caruurta. Taas oo macnaheedu yahay haddii caruurtu inta badan la joogaan labada waalid midkood, waalidka kale waxaa xil ka saaranyahay inuu ilmaha ka caawiyo dhanka dhaqaalaha (børnebidrag). Caawinaada dhaqaale ee ilmaha (børnebidrag) waxaa xaq u leh inuu helo waalidka ilmuhu la nool yihiin, waxaana bixinaya waalidka kale aan ilmuhu la noolayn.

CARUURTA, TARBIYADDA CARUURTA IYO WAALIDNIMADA

SINAANTA WIILASHA IYO GABDHAHA
Denmark gabdhaha iyo wiilashu way simanyihin. Waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah. Waa in ay u sinaadaan fursadaha nolosha waana in loola dhaqmaa si isku mid ah. Taas oo macnaheedu yahay in gabdhaha iyo wiilashuba xaq u leeyihiin inay helaan xoriyad, mas'uuliyad, xanaanyn, waajibaad iyo fursado iyo weli in loo tarbiyadeeyo si isku mid ah. Gabdhaha iyo wiilashu waxay labaduba waalidkooda xaq ugu leeyihiin inay helaan xanaanayn, kal gacayl iyo ammaan. Waxay sidoo kale waalidka xaq ugu leeyihiin in laga ilaaliyo tacadiga, takrifalka iyo ka faa'iidaysiga.

HESHIISKII CARUURTA EE QARAMADA MIDOOBAY (UN-KA)
Sanadkii 1991-dii ayey Denmark ku biirtay heshiiskii caruurta ee Qaramada Midoobay. Heshiiskaas oo laga soo saaray baaq caalami ah oo ku saabsan xuquuqda caruurta. Baaqa caalamiga ah wuxuu qeexayaa xuquuqda wiilasha iyo gabdhaha da'dooda ka yartahay 18 sano.

QODOBO KA MID AH HESHIISKII CARUURTA EE SANADKII 1989:
- Qodobka 13: ilmuhu waa in uu helaa xoriyadda hadalka iy ofekerka
- Qodobka 14: waa in la ixtiraamaa xoriyadda feker iyo diinta ee ilmaha
- Qodobka 15: waa in la ilaaliyaa xuquuqda ilmuhu u leeyahay in uu ku biiro urur
- Qodobka 16: ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inaan la soo fara-gashan noloshiisa gaarka ah, nolosha qoyskiisa, inaan waraaqo loo soo qorin iyo inaan la weerarin sharafta iyo sumcadda ilmaha
- Qodobka 17: ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay in helo xogaha khuseeya
- Qodobka 19: ilmaha waa in laga ilaaliyaa tacadiyada maskaxda (nafsi) iyo jirka
- Qodobka 22: dowladda ayaa xaqiijinaysa xuquuqda caruurta qaxootiga ah ee aan waalidkood la socon
- Qodobka 24: ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo daweyn
- Qodobka 28:ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo waxbarasho
- Qodobka 31: ilmuhu wuuxu xaq u leeyahay in uu helo nasasho iyo xilli firaaqo ah
- Qodobka 32: ilmaha waa inaan dhaqaale ahaan looga faa'iidaysan
- Qodobka 33: ilmaha waa in laga ilaaliyaa maandooriyaha (daroogada)
- Qodobka 34: ilmaha waa in laga ilaaliyaa in la faraxumeeyo

https://www.retsinformation.dk/forms/r0710.aspx?id=60837

XUQUUQDA CARUURTA
Caruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin in lagu tarbiyadeeyo sidii ay u dhex geli lahaayeen dadka kale iyo sidii ay qayb uga noqon lahaayeen bulshada. Wiilasha iyo gabdhuhuba waxay leeyihiin xoriyadda hadalka, xoriyadda diinta iyo in xor u ahaadaan noloshooda gaarka ah. Taas oo macnaheedu yahay in gabdhaha iyo wiilashu ay xaq u leeyihiin in cabiraan fekerkooda iyo in ay doortaan diinta ay doonaan.

Dabcan caruurta yar yar waa in mar walba kor lagala socdo, lakin waa in mar walba oo ay sii weynaadaanba la siiyo xoriyado dheeri ah. Waxay sidoo kale caruurtu xaq u leeyihiin in ay helaan nolol gaar u ah oo aan waalidkuna faraha la soo gelin.

Gabdhaha iyo wiilashu waxay xaq u leeyihiin in ay talada wax ku yeeshaan. Taas oo macnaheedu yahay in la dhegaysto fikirkooda laguna ixtiraamo iyo sidoo kale in wax ku yeeshaan go'aamada noloshooda taabanaysa.

Waxaa intaas dheer in labada noocba (wiilasha iyo gabdhaha) ay xaq u leeyihiin in ay dhigtaan iskuul iyo in wax bartaan. Marka ilmuhu jiro 13 sano, gabdhaha iyo wiilashu waxay iskuulka ka dib ka shaqayn karaan shaqooyinka fudud. Lakin inta ilmuhu ka gaarayo da'da 15 sano wuxuu ogolaansho inuu shaqeeyo ah uga baahanyahay waalidka.

Halkan ka aqri shaqooyinka loo ogolyahay caruurta da'doodu u dhexeyso 13 iyo 15 sano:
www.jobpatruljen.dk/regler/er-du-13-15-aar

Caruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin in ay ciyaaraan iyo inay helaan xilliga firaaqada waxyaalo ay kula baashaalaan saxiibadood iyo weliba in ay iyagu doortaan saaxiibada iyo waxay samaynayaan xilliga firaaqadaba. Waa muhiim in gabdhaha iyo wiilashu ka qayb qaataan baashaal caruurta ee xilliga firaaqada sida isboortiga, hiwaayadda (hobby) iyo naadiyada caruurta la geeyo xilliga firaaqada. Caruurta waqtiga firaaqada ka qayb qaata waxyaalaha kor ku xusan waxay helaan saaxiibo. Waxay sidoo kale is dhex-galaan caruurta iyo dhalinyarada kale waxayna noqdaad kuwo fur-furan (bulshay). Caruurta iyo dhalinyarada ka haysa wax qabtaan xilliga firaaqada ay yihiin, way ka nolol fiicanyihiin kuwa aan ka qayb qaadan ciyaarta xilliga firaaqada. Dhammaan waxyaala caruurtu ku ciyaaraan way u furan yihiin gabdhaha iyo wiilashaba. Taas oo macnaheedu yahay in aanay jirin waxyaalo loogu talo galay gabdhaha keliya ama wiilasha keliya.

Xuquuqda isku midka ah ee gabdhaha iyo wiilasha waxaa la socda waajibaadyo iyo shaqooyin laga rajeynayo in ay qabtaan. Tusaale ahaan Denmark waxaa wiilasha iyo gabdhaha laga sugayaa in ay waalidka ka caawiyaan howlaha guriga sida: adeega, cunto karinta iyo kala ururinta guriga.

In Dhalinyarada laga qayb geliyo talada iyo howsha waxay u tababartaa dhalinyarada sidii ay u qaadi lahaayeen mas'uuliyad, waxayna anfacaysaa noloshooda mustaqbalka. Xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha caruurta waxay ka dhiganyihiin in caruurta iyo dhalinyaradu u baahan yihiin in ay bartaan sidii ay ula dhaqmi lahaayeen bulshada. Tusaale ahaan waxay u baahan yihiin inay helaan aqoon sida shariciga dalka, ciqaabta, akhlaaqda, waajibaadka la iska rabo, dhaqaalaha (lacagta) iyo sida lacagta loo isticmaalo (miisaaniyada), ka hortaga cudurrada iyo ogolaansho siinta, jirka bani'aadamka iyo caafimaadka. Sidaas darteen waa in waalidka, xarumaha dhallaanka lagu xanaaneeyo iyo iskuuladu gabdhaha iyo wiilasha ka caawiyaan sidii ay u heli lahaayeen aqoontaas.

Qaybaha soo socda ka aqri mawduucyadan oo faah-faahsan.

MAS'UULIYADDA WAALIDKA IYO IKHTIYAARKA
Denmark waalidka ayaa ka mas'uul ah caruurtooda ilaa inta ay ka gaarayaan 18 sano. Mas'uuliyada waalidka waa ka mid ah in caruurtu hesho: meel ay degaan, cunto wanaagsan oo ku filan, dhar, xanaanayn iyo ammaan, iskuul, dhaqtar marka ay xanuunsadaan iyo in laga ilaaliyo tacadiyada iyo takrifalka. Gabdhaha iyo wiilashuba waa in ay wada helaan waxyaalaha kor ku xusan.

Xeerka Mas'uuliydda Waalidka: Qodobka § 2: *Qofka haya ma'suuliyadda ilmaha ayaa laga rabaa inuu u fidiyo ilmaha xanaanaynta uu ilmuhu u baahanyahay. Sidoo kale waa in qofka haya mas'uuliyadda ilmuhu, isagoo eegaya* ***maslaxadda iyo baahida ilmaha****, gaari karaa go'aamada muhiimka u ah ilmaha.*

Taas oo macnaheedu in ay waalidka saarantahay mas'uuliyadda in la ilaaliyo xuqquuqda ilmaha. Waxay kaloo la macne tahay in ay waalidka saarantahay mas'uuliyadda u-go'aan-gaarista ilmaha. Go'aamada loo qaadayo ilmaha waa inay yihiin kuwo ka tarjumaya danaha iyo baahida ilmaha. Sidaas darteed go'aamada la xiriira ilmaha waa in, iyadoo laga duulayo da'diisa, laga qayb geliyaa ilmaha.

Xeerka Mas'uuliyadda Waalidka: Qadobka § 5: *Marka laga hadlayo arimaha la xiriira ilmaha* ***waa in iyadoo laga duulayo da'diisa iyo caqligiisa la tixgeliyaa aragtida ilmaha.***

Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay in la dhegaysto lana ixtiraamo iyadoo aan loo eegayn da'diisa iyo noociisa (lab ama dhedig) toona. Marka ilmuhu sii waynaado (da' ahaan) waa in loo siyaadiyaa ikhtiyaarka. Eeg bogga xx-xx.

TALO-KA-QAYB-GELINTA IYO TALO-U-MADAXBANAANIDA CARUURTA IYO DHALINYARADA
12 sano: Talo-wadaajin:: Ilmaha waa in laga qayb geliyaa inuu wax ku yeesho go'aamada taabanaya noloshiisa sida: hoyga iyo fasaxyada**13 years:** Work: The right to have a part-time job with permission from the parents.

13 sano: Shaqo: Ilmuhu wuxuu iskuulka ka diba xaq u leeyahay inuu helo shaqo fudud isagoo ogolaansho ka helaya waalidka. Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu ogolaanshaha waalidka loogu furo koonto bangi.

15 sano: Dhaqaalaha iyo dawaynta: Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu go'aan ka gaaro in la daweeyo iyo weliba lacagta uu shaqaysto.

Da'da ugu yar galmo lagu samayn karo: Qofka jira 15 sano waa loo ogolyahay inuu u galmoodo qof jira 15 sano ama ka weyn.

Da'da ugu yar ee dambiile lagu mutaysan karo: Qofka jira 15 sano waa loo maxkamadayn karaa laguna xukumi karaa dembiga uu galay.

18 sano: Qaan-gaar: Markii qofku gaaro 18 sano waxaa dhamaanaysa mas'uuliyaddii waalidka ka saarnayd gabdhaha iyo wiilsha qaan-gaarka noqday iyo weliba awooddii waalidku talada ku lahaa.
Dumar iyo raggba marka ay qaan-gaaro (18 sano) waxay awoodaan:

- Inay u taliyaan naftooda, noloshooda iyo dhaqaalahooda (lacagtooda)
- Inay galaan heshiisyo sharci ku dhisan
- Inay doorashooyinka ka coddeeyaan iyo in la doorto.
- Inay guursadaan
- Inay qaataan ruqsadda wadida gaadiidka
- Inay doortaan meeshii ay degi lahaayeen

Qofku markuu gaaro 18 sano sida sharcigu qabo waa qof weyn oo qaan-gaar ah, wuxuuna xaq u leeyahay inuu si xor ah ugu taliyo noloshiisa. Marka ay gaaraan 18 sano, waalidku uma talin karo wiil iyo gabar midna. Waxaa sidoo kale dhamaanaya waajibkii masruufka iyo xanaaynta ee waalidkaa ka saarnaa ilmihiisa. Haddii qof 18 sano ka wayn la deganyahay waalidkiisa, waalidku waxay ku maamuli karaan haddii qofku isticmaalo lacagtooda iyo alaabtooda.

NOLOSHA GAARKA AH EE QOFKA
Dhammaan dumarka iyo ragga, gabdho iyo wiilal waxay xaq u leeyihiin in yeeshaan nolol khaas ah. taas oo macnaheedu yahay inaan ogolaansho la'aan la aqrin karin fariimaha qofka sida gaarka loogu soo diro sida: SMS-yada iyo Email-da. arintani waxay sidoo kale khusaysaa waalidka, walaalaha iyo xaaska. Tusaale ahaan waalidku ogolaansho la'aan waa in aanay eegin telefoonka ilmihiisa.

Lama ogola in qof kormeer ama dabagal lagu sameeyo. Sidoo kale qof lagama codsan karo in uu dabagal ku sameeyo qof kale. Taas oo macnaheedu yahay inaan qofku dabagal ku samayn Karin tusaale ahaan walaalihiisa ama xaaskiisa. Sida uu qorayo heshiiskii caruurta ee Qaramada Midoobay ayna saxiixday Denmark, lama ogola inaad dabagal ku samaysid caruurtaada. Arintan waxaa looga gol leeyahay in waalidku aanay ka codsan karin walaalaha inay isbada galaan (is basaasaan) ama is kormeeraan. Dabcan arintani waxay khusaysaa caruurta waaweyn ee naftooda ka taxadari kara ama ilaalin kara.

Tusaale ahaan qofku kor waa eegi karaa profile-ka caadiga ah ee ilmihiisa ama xaaskiisa ku leeyihiin baraha bulsha (social media) lakin ogolaansho la'aan lama ogola in qofku galo profile-ka qofka isagoo isticmaalaya password-ka qofka.

CADDAADIS BULSHO
Waxaa jira farqi u dhexeeya talo-siinta iyo khasabka. Waa mas'uuliyad saaran waalidka inay tarbiyadeeyaan caruurtooda. Caruurta dhalinyarada ah waxay xaq u leeyihiin in ay talo ku yeeshaan go'aanada waaweyn ee la xiriira noloshooda.

Waalidku waxay xaq u leeyihiin inay fikirkooda ka dhiibtaan go'aanada ay qaataan ilmahoodu lakin waa in aanay adeegsan caddaadis bulsho. Caddaadis bulsho waxaa loola jeedaa in qofka la caddaadiyo, la khasbo ama la maamulo si qofku u bedelo hab dhaqankiisa. Waxaa dhici karta in caruurta la hor dhigo cunaqabayn ama ciqaab hadey waalidka adeeci waayaan. Waalidku waa in aanay gabdhahooda iyo wiilashooda ugu hanjabin cawaaqib xumo haddii ay tusaale ahaan diidaan inay guursdaaan qofka waalidku u dooro inay guursdaan. Sidoo kale lama ogola in waalidku ilmihiisa ku cadaadiyo, ku khasbi karo ama ku maamulo waxbarashada ay doranayaan, waxay sameeynayaan waqtigooda firaaqada, qofka ay saaxiib la noqonayaan ama qofka ay u dooranayaan in uu noqdo lamaanahooda.

Waa in waalidku ilaaliyaa sharciga dalka isla markaasna ixtiraamaan xaqa caruurtu u leeyihiin in ay talada wax ku yeeshaan. Waxay deriska ama saaxiibadu aaminsanyihiin (la tahay) kama muhiimsana xaqa qofku u leehay aaya-ka-talinta arimihiisa.

DHAQAN CELINTA ILMAHA
Lama ogola in waalid khiyaaneeyo ilmihiisa iyadoo tusaale ahaan loo sheegeeyo caruurta in la geynayo fasax lakin halkii fasax laga geyn lahaa safar dhaqan-celis ah oo muddo dheer ah loogu diro dalkii hooyo ama in loo diro dalka dibadiisa si loogu guuriyo qof kale.

Safar dhaqan-celin ah waxaa loola jeedaa safar muddo dheer ah oo dalkii waalidku ka yimid loogu diro ilmo da'diisu ka yartahay 18 sano iyadoo aan la tixgelinayn rabitaanka ilmaha. Safarka dhaqan-celintu wuxuu cawaaqib wayn ku yeelan karaa ilama ama dhalinyarada, sababtoo

ah waxay keeni in ilmuhu ka aamin baxo qoyskiisa iyo inay ugu dambaynta sababto burbur ku dhaca xiriirka qoyska. Waxaa intaas dheer in maqnaanshaha ilmuhu ka maqanyahay dalka ay cawaaqib xumo ku yeelato sharcigii deganaanshaha ilmaha iyo waxbarashadiisii. Waa dembi lagu mutaysan karo ciqaab in loo diro safar dhaqan-celin ah.

MAS'UULIYADDA DOWLADDA

In kasta oo mas'uuliyadda caruurta ka yar 18 sano ay waalidku leeyihiin, waxaa sidoo kale dowladda mas'uuliyadi ka saarantahay in ilmuhu hayso nolol fiican iyo inaan xuquuqdooda lagu tuman. Sidaas darteed mas'uuliyiinta arimaha bulshadu waxay xaq u leeyihiin waajibaadna ka saaranyahay in ay soo fara-geliyaan haddii waalidku mas'uuliyadiisa ka soo bixi waayo. Tusaale waa mamnuuc in waalidku caruurtiisa garaaco waxaana tacadiyada lagula kaco caruurta lagu mutaysan karaa ilaa 6 sano oo xabsi ah.

Haddii waalidku ka soo bixi waayo mas'uuliyada caruurtiisa, mas'uuliyiinta arimaha bulshadu waxay haddii xaalku xumaado waalidka ka qaadi karaan caruurtiisa. Hase yeeshee waa dhif in waalidka si xoog ah looga qaado ilmihiisa. Tusaale ahaan waxaa waalidka ilmaha laga qaadaa haddii caafimaadka ama koriimada ilmuhu ku jirto khatar. Waxayse mas'uuliyiintu inta badan isku dayaan inay hagaajiyaan dhibaatooyinka guriga ka jira. Waalidka u baahan caawinaad ama talo-bixin ku saabsan caruurtooda waxay la soo xiriiri karaan caruurtooda.

Dhammaan shacabka denmark waxaa waajib ka saaranyahay in ay dowladda hoose (kommuunka) ku wargeliyaan haddii ay la noqoto in ilmo yar ama qof dhalinyaro ah ku noolyahay duruufo dhaawac u geysan karaa caafimaadkiisa iyo koriimadiisa. Tusaale ahaan waxay noqon kartaa tacadi iyo takrifal loo geyso ilmah ama dhalinyarada.

Waqtigan waxaa la filayaa in waalidku caruurta wada-hadal ku tarbiyadeeyaan, halkii berigii hore ilmaha laga garaaci jiray. In ilmaha la garaaco waxay dhaawac u geysataa koriimada iyo caafimaadka ilmaha. Waxay cawaaqib wayn ku yeelan kartaa waxbarashada iskuulka iyo dadla-dhaqanka ilmaha.

Sidaas darteed waa muhiim in waalidku isku dayo inuu fahmo heerarka kala duwan ee caruurtu u korto, u fekerto ama wax u bartaan. Waa in waalidku halkii uu tarbiyeynta ku salayn lahaa in ilmuhu yahay wiil ama gabadh isku dayaa inuu ku saleeyo tarbiyeynta da'da iyo fahamka ilmaha. Sidoo kale waa in waalidku ogaadaa in gabdhaha iyo wiilashu kala duwanyihiin. Sidoo kale gabdhaha iyo wiilashu waxay u koraan si kala duwan.

Haddii ilmo si xun soo loola dhaqmo una baahanyahay dad uu kala sheekaysto, wuxuu lacag la'aan ku soo wici karaa telefoonka caruurta (Børnetelef) ee lambarkiisu yahay 116 111. waxaad heli kartaa talo-bixin la xiriirta wixii aad samayn lahaa xaaladaha adag ee kala duwan. Waxaad sidoo kale bogga internetka børnetelefonen.dk kala sheekaysan kartaa qof weyn oo talo-bixiye ah. tala-bixiyaha iyo qofka talada la siinayoba lama aqoonsanayo (anonymt).

XARUN MAALMEEDYADA CARUURTA

Denmark inta badan wiilasha iyo gabdhuhu waxay bilaabaan xanaanada maalintii lagu hayo ilmaha yar yar (vuggestue iyo dagpleje) marka da'doodu gaarto 11 bilood. Waxay bilaabaan xanaanada caadiga ah ee caruurta marka ay jiraan 3 sano ilaa 6 sano. 90% ka mid ah caruurta da'doodu u dhexayso 0-2 sano iyo 97% ka mid ah caruurta da'doodu u dhexeyso 3-5 sano waxay tagaan xarumaha maalintii caruurta lagu hayo.

Waxaa jirta faa'iidooyin badan in caruurtu la geeyo xarumaha caruurta waxaana ka mid ah: ilmuhu wuxuu ku biirayaa lana ciyaarayaa caruurta kale, waxay baranayaan la dhaqanka dad ka baxsan qoyskooda, waxay baranayaan luuqadda daanishka, waxay wax ka baranayaan bulshada iyo dhaqanka daanishka, waxaa u fududaanaya inay dadka dhex galaan iyo inay koraan iyo inay isku filnaadaan. Tusaale ahaan way adagtahay in qofku qaato waxbarasho iyo inuu helo shaqo haddii aanu ku hadli Karin luqada daanishka.

Waa lacag in ilmuhu tago xanaanooyinka kala duwan ee caruurta sida vuggestue, dagpleje iyo børnehave. Haddii dakhliga soo gala waalidku aanu badnayn waxay codsan karaan caawinaad (kabitaan) ama boos lacag la'aan ah (friplads).

WAXBARASHADA WAAJIBKA AH EE CARUURTA IYO MAS'UULIYADDA WAALIDKA

Ilmuhu waa inuu iskuulka tagaa marka uu gaaro 6 sano. Iskuulada dowladdu waa lacag la'aan. Dhammaan caruurta, gabdho iyo wiilal, waxay xaq u leeyihiin iyo waajibaada ka saaranyahay inay iskuulka tagaan ilaa fasalka 10aad. Wiilasha iyo gabdhuhu waxay xaq u leeyihiin iyo waajibaadna ka saaranyahay inay dhammaan maadooyinka iskuula sida maadooyinka cilmiga ah, kuwa hal-abuurka ah iyo kuwa isboortiga ah.

Dhammaan caruurta iyo dhalinyada dhigata iskuulada Denmark, gabdho iyo wiilal, waa inay waqtiyo badan loo dhigaa maado la xiriirta aqoonta galmada (seksualundervisning). Taas macnaheedu maahan in caruurta iyo dhalinta lagu dhiiri gelinayo inay sameeyaan galmo lakin waxay helayaan aqoon la xiriirta xubnaha taranka iyo jirka bini'aadamka, galmada iyo sida looga hortago cudurada la isku qaadsiiyo galmada iyo uurka aan la qorshaysan.

Waa mas'uuliyad saaran waalidka in ilmuhu tagaan iskuulka iyo inay helaan waxbarashada khasabka ah. Waa muhiim gabdhaha iyo wiilashu fursad u helaan waxbarashada iyo inay helaan waqti ay casharada ku diyaariyaan. Waxaa sidoo kale muhiim ah in waalidku isku si ugu han-weynaadaa gabdhaha iyo wiilasha. Waalidku waa inay si isku mid ah xoogga u saaraan waxbarashada gabdhaha iyo wiilasha. In caruur iskuul dhigtaan waxay aasaas u tahay inay helaan mustaqbal wanaagsan iyo ka-qayb-galkooda bulshada.

Sidoo kale waa muhiim in caruurtu hesho waqti firaaqo ah oo ay nastaan iyo inay ka qayb qaataan ciyaaraha iyo baashaalka xilliga firaaqada. In kasta oo ay wanaagsantahay in caruurta iyo dhalintu waalidka ka caawiyaan shaqada guriga, haddana waa muhiim in aan wiilsha iyo gabdhaha midna loo dirin shaqo aad u badan oo keenta inay waqti u waayaan iskuulka, diyaarinta casharada iyo ka-qayb-qaadashada ciyaaraha xilliga firaaqada.

Waalidka waxaa laga rabaa inuu la shaqeeyo shaqaalaha iyo macalimiinta ka howl gala xarunta xanaanada iyo iskuulkaba ilmihiisu dhigto. Taas oo macnaheedu yahay in waalidku kulamada waalidiinta iskuulka iyo howlaha kale ee ka socda xanaanada iyo iskuulka. Hooyada iyo aabuhuba waxay mas'uuliyad ka saarantahay korriimada iyo tarbiyadda caruurta, waxaana in labaduba ka qayb qaataan howlaha ka socda xarunta xanaanada iyo iskuulkaba. Haddii ay lagama maarmaan tahay waalidku wuxuu markuu ka qayb qaadanayo howlaha iskuulka codsan karaa in loo qabto turjumaan. Waxaa aabaha iyo hooyadaba waajib ka saaranyahay in hadey awoodaan ilmaha ka caawiyaan casharada ama u raadiyaan qof kale oo ka caawiya. Waxaa kale oo waalidka waajib ka saaranyahay in ilmuhu helo hurdo iyo nasniin ku filan iyo in ilmuhu cunto u soo qaato iskuulka (madpakke).

Xarumaha xanaanada iyo iskuuladu waxaa waajib ka saaranyahay inay la xiriiraan waalidka haddii ay walaacsan yihiin ilmaha. Denmark waxay ka tahay dhaqan in macalimiinta, waalidiinta iyo ilmuhu ka wada hadlaan xaalka ilmaha iyo waxbarashadiisa. Waxayna si wada jir ah xal ugu

helaan dhibaatooyinka jira. Haddii waxyaalo waaweyni ka dhaceen guriga, waa fikrad wanaagsan in waalidku uga waramo macalinka si loo ogaado inay saamayn inay saamayn ku reebto xaalka guud ee ilmaha iyo waxbarashadiisa.

DHALINYARADA DENMARK
Marka ay weynaadaan Denmark gabdhaha iyo wiilashu waxay helaan xoriyad balaadhan. Lakin waxaa sidoo kale qofka markuu sii waynaado fuula mas'uuliyado badan. Marka laga eego dhanka sharciga mas'uuliyadaha iyo xuquuqaha dhalinyaradu waxay si gaar ah isu bedelaan marka ay gaaran da'da 15 sano iyo 18 sano.

15 sano
Marka uu qof gaaro 15 sano wuxuu xaq cad u leeyahay inuu waqtiga firaaqada helo shaqo. Isaga ayaan maamulaya lacagta uu shaqaysto ama loo siiyo hadiyad ahaan, waalidku kama isticmaali karaan umana diidi karaan lacagtiiga.

Marka qofku gaaro wuxuu xaq u leeyahay inuu u madax banaanaado dawayntiisa. Taas oo macnaheedu yahay in qofku go'aan ka gaari karo inuu aqbalo baaritaanada caafimaad ama daweynta loo soo bandhigo. Hase yeeshee dhaqtarka wax waajib ah kama saarna inuu waalidka ka qariyo arimaha caafimaad ee ilmaha. Waa in waalidka lala socodsiiyaa caafimaadka ilmahooda haddii ilmuhu ka yaryahay 18 sano. Haddii macluumaadka dhaqtarku hayo ay khilaaf ka dhex abuuri karto ilmaha iyo waalidka (tusaale ahaan sida macluumaadka la xiriira xiriirka galmo ee illmaha), dhaqtarku wuu iska dhaafi karaa in wargeliyo waalidka.

Da'da ugu yar ee lagu noqon karo dembiile waa 15 sano. Taas oo macnaheedu yahay in marka qofku gaaro da'da 15 sano, loo maxkamadayn karo laguna xukumi karo dembiga uu galo. Inta ilmuhu ka gaarayo 18 sano waxa lagu haynayaa xabsiga dhalinyarada ama xarun ammaankeedu suganyahay. Gabdhaha iyo wiilashu waxay mutaysanayaan isku ciqaab haday isku dembi yihiin. Marka ilmuhu ka yaryahay 15 sano, lama lagu ridimaayo xukun maxkamadeed. Waxbana looguma qorayo waraaqda dembiga lagu qoro (straffeattest). Waalidka dhalay ilmaha ayaa laga dalban karaa inuu bixiyo ganaaxyada ama magdhaw haddii ilmuhu galo dembi. Haddii ilmo ka yar 15 sano galo dembi weyn ama ilmo waqtiyo dembi galo, waxaa ilmaha la gelin karaa xaruntа dhalinyarada lagu hayo (unginstitution).

Sidoo kale da'da ugu yar ee qofku galmo ku samayn karo waa 15 sano. Taas oo macnaheedu yahay in qofku u madaxbanaanyahay noloshiisa galmo, marka uu gaaro 15 sano. Arintan waxaa loola jeedaa in la ogolyahay in loo galmoodo wiil ama gabar jirta 15 sano haddii qofku raali ka yahay. Waa dembi in qof 15 sano ka wayni u galmoodo gabar ama wiil ka yar 15 sano. Waa dembi xataa haddii qofka 15 sano yari raali yahay galmada. Galmo waxaa loola jeedaa nooc walba oo isku tagid ah, maahan keliya in furaashka la isla tago. Qofkii lagu helo inuu u galmooday caruur ka yar 15 sano, gabdho iyo wiilal, wuxuu mutaysanayaa gaaraya 8 sano. Haddii ilmuhu ka yaryahay 12 sano wuxuu xabsigu gaarayaa 12 sano.

Laba qof oo 14 sano jir ah way isu galmoon karaan haddii ay labaduba raali ka yihiin. Lakin qof 15 sano jira uma galmoon karo qof jira 14 sano. Waxbana kuma kala duwana in qofku yahay gabar ama wiil. Haddii qof 15 sano jir ah u galmoodo qof 14, 5 (afar iyo sano iyo bar) jir ah lama soo dacweynayo sababtoo ah da'da labada qof ayaa aad isugu dhow (isku fil).

18 sano
Marka qofku gaaro 18 sano, sharci ahaan wuxuu noqonayaa qof weyn iyo qaan-gaar. Taas oo macnaheedu yahay in wiilasha iyo gabdhuhu sida dadka kale helayaa xuquuqo iyo waajibaadyo isku mid ah marka ay gaaraan 18 sano. waxaa inta ku xusan bogga xx dheer, in qofku tusaale ahaan saxiixi karo heshiisyo sida deynt-qaadasho iyo heshiisyada wax kala iibsiga. Heshiisyada qoraalka ah lagama bixi karo. Sidaas darteed waa muhiim in qofku hubsado inuu ogyahay waxa uu saxiixayo. Haddii kale waxaa dhici karta in qofku isaga oo aan ogeyn si khalad ah uga tanaasulo qayb ka mid ah xuquuqdiisa ama dusha u rito waajibaad uu hadhow ka qoomamayn doono ama aanu awoodi karin dhaqaale ahaan. Saxiixa qof dumar ah iyo qof rag ah waa isku miisaan waana isku mid.

Marka qofku gaaro 18 sano haddii uu dembi galo waa la maxkamadayn karaa waana la ciqaabi karaa sida dadka kale.

JIRKA IYO GALMADA

Demark waxaa jira dad badan oo dhalinyaro iyo dad waaweyn isugu jira, oo qof kale la wadaaga xiriir jacayl (kæresteforhold). In xiriir jacayl la leeyahay waxay ka dhigantahay in laba qof ay ka dhexayso kal-gacayl, lagana yaabo inaysan khasab ahayn in labada qof isku galmoodaan iyagoo aan is qabin. Denmark inta badan dadku waxay soo tijaabiyeen galmo inta aanay guursan. Dumarka iyo raga midkoodna lagama rabo inuu ahaado bikrad marka ay guursanayaan. Sida caadiga ah dhaqanka bulshada daanishka bikradnimadu wax xiriir lama laha sharafta iyo dhowrsanaanta.

Sidoo kale waa caadi in iyadoo la ixtiraamayo kala duwanaanshaha heerarka shishoodka ee dada, si furan looga hadlo jirka iyo galmada.

Dumar iyo ragguba iyaga ayey u taal marka doonayaan galmo iyo qofka ay doonayaan inay la galmoodaan. Lakin qof 15 sano ka weyni uma galmoon karo qof 15 sano ka yar.
Dad badan oo dumar iyo rag leh ayaa galmadu qayb muhiim ah ka tahay xiriirkooda. Labada dhinacba waxay xaq u leeyihiin inay sheegtaan rabitaankooda galmo lakin naagta iyo ninka midkoodna kama dalban karo kan kale inuu buuxiyo rabitaankiisa. Mar walba way wanaagsantahay in lamaanaha is qaba ama wada nool ka hadli karaan galmada.

Wixii macluumaadka ah ee la xiriira ragga iyo dumarka, jirka bani'aadamka iyo galmada waxaad ka heli kartaa dhaqtarkaaga, xarumaha ay ka howl galaan dhaqtarada aqoonta u leh galmada (sexologiske klinikker) ee ku yaal dalka oo dhan iyo hay'adda galmada iyo bulshada (Sex and Samfund) telefoonka hay'adda Sex and Samfund waa sidan: 33931010.

DADKA U GALMOODA DADKA LA NOOCA AH (KHANIISNIMADA)
Sida aan horay u soo sheegnay laba nin ama laba naagood ayaa is guursan kara Denmark. Waxay isku guursan karaan kaniisadda iyo guriga degmada (rådhuset). Waxaa sidoo kale heli karaan caruur ay korsadaan (adoption). Khaniisiinta iyo dadka la midka ahi waxay bulshada inteeda kale kala mid yihiin xuquuqaha iyo waajibaadyada.

Waa in dadka lagu ixtiraamo rabitaankooda galmo iyo inaan loogu qaylin erayo af-lagaado ah, loo gaysan tacadi, lagu samayn handadaad ama lagu kicin dadka iyadoo qofku sidaas u yeelayo sababtoo ah wuxuusan jeclaysan qaab galmoodkooda ama lamaanaha ay doorteen.
Haddii qof dambi ka galo qof kale sabtuna tahay tusaale nooca qofka (rag ama dumar), diinta qofka, midabka qofka ama hab galmoodka qofka, dembiilaha waxaa si adag:

> **Xeerka Ciqaabta: Qodobka § 81:** *"Marka xukunka dembiilaha laga tashanayo waa xisaabta lagu daraa in dembiga la galay loo geystay iyadoo sababtuna tahay isir, diin, hab galmood ama wax la mid ah."*

XUUBKA BIKRADNIMADA
Dad badan ayaa aaminsan in xuubka bikradnimadu calaamad u yahay bikradnimada qof dumar ah. Lakin xuubkani ma ahan waxay dad badani ka aaminsanyihiin oo ah xuub qarxi kara oo is haysta ilaa siilka. Waxaa jira dalool dhiigga caadadu ka soo baxo.

Inta badan dumarka ka yimaado wax dhiig ah marka ugu horreysa ee ay sameeyaan galmo. Xataa haddii qofka dhiig ka yimaado looma fasiran karo in dhiigaasi yahay kii xuubka bikradda lakin wuxuu noqon karaa waxyaalo kale sida nabar gaaray gudaha siilka. Sidoo kale lama arki karo lamana dareemi karo in qof dumar ah loo soo galmooday iyo in kale. Xataa dhaqtarku ma ogaan karo.

Sidaas darteed suurto geli maaha in xuubka bikrada dib la isugu kabo haddii uu go'o. dhaqtarada qaarkood ayaa sameeya qaliin ay dumarka ugu sameeyaan xuub macmal ah. Lakin si kasta oo la sameeyo qaliin loogu soo celinayo xuubka bikrada, lama hubo in haweentu dhiigayso iyo in kale marka u horeysa ee ay galmo samayso.

GUDNIINKA
Gudniinka gabdhuhu waa ka mamnuuc Denmark:
Xeerka Ciqaabta § 245 a: *"Qofka qof kale u geysta dhaawac jireed, ogolaansho ha u haysto ama yaanu u haysan, ama jarjara qaybta sare xubinta taranka haweenka, qayb ahaan ama gebi ahaan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi gaaraya 6 sano"*

Qodobka § 246: *"Haddii dhaawaca jireed ee lagu xusay qodobka § 145 ama § 245a ee xeerka ciqaabta, yahay mid khatartiisu aad u wayntahay ama dhaawacyadu ahaayeen kuwa waaweyn ama geeri sababay, waxaa jira duruufo qalafsan, sidaas darteed waxa xukun noqonayaa 10 sano".*

Sharcigani wuxuu shaqaynayaa, xataa haddii gabadha dalka laga saaro oo dibada lagu soo gudo:

Xeerka Ciqaabta: Qodobka § 7 *"Waa la marsiinayaa xeerka ciqaabta daanishka dembiyada lagu galo dalka dibadiisa ee uu galo qof haysta (waqtiga la soo eedeeyey) dhalashada daaniskha, ama degan dalka Denmark ama haysta deganaansho rasmiga ee dalka haddii:*

2) Dembiiluhu xilliga fal-dembiyeedka dalka la lahaa xiriirka kor ku xusan iyo falka

a) dembigu yahay ka galmo kaga faa'iidaysiga caruurta, ka ganacsiga dadka ama gudniinka dumarka ama

b) dembiga la galay qof, waqtigii falku dhacayey dalka ku lahaa xiriir aan soo sheegnay."

SOO TUURIDDA ILMAHA (SOO-XAAQID)
Denmark si fudud ayaa looga heli karaa waxyaalaha lagaga hortago uurka. Talo bixin ku saabsan ka hortaga uurka iyo kiniiniga ka hortaga uurka (p-piller)waxaa laga dhaqarkaaga. Waxaa sidoo kale jira noocyo ka mid ah waxyaalaha lagaga hortagu uurka oo warqad la'aan looga gadan karo supermarkedada, kiosk-yada iyo farmashiyada. Dadka oo dhan, dumar iyo ragba, way heli karaan waxyaalaha lagaga hortago uurka. Lakin waa in qofku iibsadaa.

Haddii qofku qaado uur aanu doonayn wuu iska soo tuuri (xaaqi) karaa ilamaha ilaa inta laga gaarayo asbuuca 12-aad. Haddii qofku doonayo inuu ilmaha iska soo tuuro(xaaqo) marka la dhaafo asbuuca 12-aad, waa in la helaa sabab miisaan leh oo keenaysa in ilmaha la soo tuuro. Haweenta uurka ayaa iska leh go'aanka ah in ilmaha la soo tuuro iyo in kale. Ninkeeda, waalidka, qoyska ninkeeda midkoodna shaqo kuma lahan go'aanka ay haweenta uurka lihi ka gaarayso

uurka. Haddii haweentu qaado uur aanay doonayn waxaa haboon inay kala hadasho lamaanaheeda si ay uga wada tashadaa wixii ay yeeli lahaayeen. Dhaqaatiirka iyo isbitaalada waxay leeyihiin waajib sir hayneed (tavshedspligt). Taas oo macnaheedu yahay inaan ninkaaga ama qoyskaagu midna wax ka ogaanayn uurkaaga ama inaad ilmaha iska soo xaaqaysid haddii aadan adigu iskaa dadka ugu sheegin.

Haddii qofku ka yaryahay 18 sano isla markaasna doonayo inuu ilamaha iska soo tuuro, sida caadiga waa in qofku ogolaansho ka haysto mid ka mid ah labadiisa waalid. Haddii waalidku ay diidaan inay ogolaansho siiyaan ilmo soo tuurista ama ay jirto sabab weyn oo looga qarinayo inay ogaadaan uurka ama qorshaha ilmo soo tuurista, qofku wuxuu, iyagoo aan waalidku la socon, codsan karaa in loo ogolaado inuu ilmaha iska soo tuuro iyo iyadoo aan waalidkana waxba la ogeysiinayn. Howshan dhaqtarka ayaa caawinaya.

Tirada dumarka ilmaha iska soo xaaqa ayaa hoos usii dhacaysay tan iyo 1970-yadii, xiligaas oo dumarka xaq u yeesheen in ay ilmaha iska soo tuuri karaan. Waqtigan 15-16000 oo haween ah ayaa ilmaha iska soo tuura sanad walba. Dumarka ajnabiga ah ee aan reer galbeedka ahayn (ikke-vestlig) ayaa ah tirada u badan ee ilmaha iska soo xaaqa, iyadoo sanadkii 2015 kunkii (14 per 1000 haween ah) haween ajnabi ah ay 14 ilmaha iska soo tureen, halka haweenka daanishka ah (9 per 1000) kunkiiba 9 ka mid ah iska soo tuureen.

TACADIGA IY KUFSIGA

KUFSIGA IYO AKHLAAQ XUMIDDA
Dhammaan ragga iyo dumarku waxay xaq u leeyihiin inay siday doonaan ka yeelaan jirkooda iyo inay la galmoodaan qofka ay doonaan. Taas oo macnaheedu yahay inay dembi tahay in qof lagu khasbo galmo aanu doonayn, ha noqdo kufsi galmo la sameeyey ama mid nooc kale ahba ahaatee. Dumarka iyo ragguba waxay xaq u leeyihiin inay dhahaan galmo ma doonayo ama iga joog, waana in lagu ixtiraamaa rabitaankooda. Haddii qofku weli isku dayo inuu qofka galmo la sameeyo ka dib markii qofku sheegay in aanay doonayn, waxay noqonaysaa kufsi xataa haddii qofka la kufsaday aanu muujin wax wax-iska-caabin ah.

Arintani waxay xataa khusaysaa dadka is qaba. Taas oo macnaheedu yahay inaan labada lamaane isku lahayn waajibaad galmo. Waxay noqonaysaa fal kufsi ah haddii labada lamaane midkood ku qasbo kan kale inuu u galmoodo isagoo adeegsananay tacadi ama handadaad. Kufsiga waxaa lagu mutaystaa xabsi gaaraya ilaa 8 sano iyadoo xaaladaha culusna xukunku gaarayo ilaa 12 sano. Kufsiga ka dhex dhaca lamaanaha is qaba wuxuu la mid yahay falalka tacadiga waxaana ka dhalanaya furiin deg deg ah oo aan lahayn kala maqnaasho la isku soo noqon karo (separation)

Xeerka Ciqaabta: §216: *" waa mamnuuc in tacadi iyo hanjabaad tacadi lagu khasbado galmo."*

Sidoo kale waa mamnuuc in galmo lala sameeyo qof aan awoodi Karin inuu ogolaansho bixiyo sida tusaale ahaan qof suuxsan, qof aad u sarkhaansan ama qof ay saamayn ku yeelatay daawo ama daroogo ka tan badatay.

Haddii aad la kulantay kufsi ama isku day kufsi, ama qof aad garanaysid galmo kugu khasbay waxaad la xiriiri kartaa xarunta kuugu dhow ee dhibanayaasha kufsidga (Voldtægtsofre). Sidoo kale waa kufsi haddii qof aad is qabtaan adiga oo aan rabin kugu qasbay galmo.

Xarunta dhibanayaasha kufsigu waxay ku taal gobol walba waxaadna kala xiriiri kartaa telefoonka: 78463543.

Sidoo kale waa mamnuuc in dadka kale la gaarsiiyo dhib xiriirta galmo ama anshaxooda meel looga dhaco. Marna ma fiicna in qof loo taabso si dareen galo ah ku jirto, haddii aanu qofku rabin sidaas, iyadoo aan loo eegayn sida qofku u dhaqmayo ama u lebisan yahay qofka. Sidoo kale lama ogola in qof hortiis la isku qaawiyo ama qofka la tuso xubnaha taranka haddii aanu qofku rabin.

Xeerka Ciqaabta: § 232: *"Qofka si aan akhlaaqda waafaqsanayn wax u dhima anshaxa, waxaa lagu xumukayaa ganaax lacageed ama xabsi ilaa 2 sano ah, haddii uu goobta ka dhow yahay ilmo ka yar 15 sano wuxuu qofku mutaysanayaa ganaax lacageed ama xabsi ilaa 4 sano."*

TACADIGA
Tacadigu waa dembi ciqaab lagu mutaysto lagamana ogola Denmark.

Xeerka Ciqaabta § 244: *"qofka ku sameeya tacadi ama dhaawac u geysta jirka qof kale, waxaa ciqaabayaa ganaax lacageed ama xabsi ilaa 3 sano ah."*

Xeerka Ciqaabta § 245: *"qofka dhaawac u geysta qof kale, haddii dhaawucu yahay mid culus, waxashnimo ah ama gaarsiisan heer khatar ah ama qofku qirto inuu tacadi geystay, waxaa lagu xukumayaa 6 sano oo xabsi ah. haddii dhaawacu gaarsiiyo xubnaha qof dhaawac weyn ama dhaawac soo gaaro caafimaadka qofka, xukunka iyo ciqaabtaba waa la adkaynayaa."*

Tacadiyada aya isku geystaan lamaanuhu waxay la mid yihiin tacadiyada ay dadka kale isku geystaan, waana dembi la mid ah dembiyada kale ee la xiriira tacadiga. Sidaas darteed waa dembi in qofku garaaco lamaanihiisa, xataa hadduu u malaynayo in qofku si qalad ah dhaqmay ama wax si kale la isku af dhaafay. Tacadigu ma ahan in qofka jir ahaan wax loo gaarsiiyo keliya. Tacadigu wuxuu noqon karaa: gacan-ka-hadal (garaacid) ama handadaad qofka cabsi gelisa, xanuun ama dhaawac u geysata. Sidoo waxay soo gelaysaa tacadiga haddii qofka sharaftiisa meel looga dhaco. Tacadigu wuxuu noqon kara fal si ula kac loo sameeyey ama fal aan waxba loogala jeedin lakin qofka nafad ahaan wax u yeeli kara.

Noocyada tacadigu way badan yihiin waxaana ka mid ah: tacadi jir ahaaneed, tacadi maskaxeed, tacadi galmo, tacadi hantiyeed ama dhaqaale:

- Tacadiga loo geysto qofka jirkiisu wuxuu tusaale ahaan noqon karaa: dharbaaxo, laad, ceejin iyo in qofka la qabsado.
- Tacadiga maskixiyan qofka wax loogu geysto wuxuu noqon karaa: in qofka lagu hayo kantarool ama lagu haysto xoog, in qofka lagu sameeyo sharaf dhac, in qofka noloshiisa la geliyo ciriiri ama loogu hanjabo tacadi loo geysanayo.
- Tacadiyada galmada ee qofka loo geysto waxay noqon karaan tusaale ahaan: in qofka loo geysto kufsi ama in qofka lagu qasbo fal galmo oo aanu raali ka ahayn.
- Tacadiyada alaabta ama hantida qofka loo geysto waxay tusaale ahaan noqon kartaa: in si ula kac ah loo burburiyo alaabada ama dharka qofka.
- Tacadiga dhaqaale ama lacageed ee qofka loo geysto waxay tusaale ahaan noqon kartaa: in qofka loo diido lacagtiisa.

Haddii aad tahay qof tacadi geysta (ku-tacadiye), waxaad si aad qoyskaaga uga badbaadiso tacadiga iyo sidii aad laftigaagu isaga dayn lahad tacadiga, caawinaad waydiisan kartaa hay'adda la dagaalan tacadiyada www.dialogmodvold.dk ama soo wac teleefonka 35301717.

Waxaa dalka oo dhan ku yaal xarumo (krisecentre) loogu talo galay dumarka iyo ragga ka soo carara tacadiyadda kala duwan. Dumarku waxay in muddo ah deganaan karaa mid ka mid ah xarumahan. Qofku caruurtiisa wuu la degi karaa xarunta. Xurumahan waxaa sidoo kale ka mid ah qaar loogu talo galay: ragga la kulma tacadiyada, kuwo loogu talo galay qoysaska, kuwo loogu talo galay lamaanayaasha iyo ugu dambayntii qaar loogu talo galay ragga aan xaaska ahayn ee ka soo carara tacadiyada ay geystaan qoysaskoodu ee la xiriira ilaalinta sharafta qoyska.

Waxaad boggan internetka ee hoos ku qoran ka heli kartaa liista xarumaha loogu talo galay dadka ka soo carara tacadiyada: www.levudenvold.dk

Haddii aad u baahantahay talo bixin iyo hagitaan la xiriira tacadiyada ay isu geystaan dadka xiriirka dhow leh, waxaad maalin iyo habeenba (24 saac) la soo xiriiri telefoonkan 70203082. Dhammaan dumarka, ragga iyo qaraabada kaleba, Waxay mar walba iyo meel kasta oo ay dalka ka joogaanba soo wici karaan teleefonkan iyagana oo aan sheegayn qofka ay yihiin.

Ragga tacadiyada kala kulma lamaanahooda waxay soo wici karaan telefoonka: 70116263. Faah-faahinta ka aqri halkan www.voldmodmand.dk

Dhalinyarada isir ahaan ka soo jeeda qowmiyadaha kale ee ku nool Denmark, waxay caawinaad waydiisan karaan ururka ama hay'adda Etnisk Ung. Faah-faahinta ka aqri halkan www.etniskung.dk

Xarunta RED-Safehouse waxaa meel ay degaan ka heli kara dhalinyara (gabdhha iyo wiilasha) keligood ah iyo weliba kuwa lamaanaha ah ee ka soo carara tacadiyada ay u geystaan qoysaskoodu ee la xiriira ilaalinta sharafta qoyska. Faah-faahinta ka aqri halkan www.safehouse.dk

= RET TIL LIGESTILLING



MINISTER FOR LIGESTILLING

Dette kursushæfte er udviklet af Als Research og Dansk Flygtningehjælp i forbindelse med kampagnen RET TIL LIGESTILLING, der gennemføres på vegne af Ligestillingsafdelingen i Udenrigsministeriet.